# Bayaan Tirsi 76/2001

## Bayaan ka aasaasidda maamulada degmooyinka iyo tuulooyinka dawlada deegaanka Soomaalida

## አዋጅ ቁጥር 76/2001

## የሶ/ክ/መንግስት የወረዳና የቀበሌ አስተዳደሮች የገጠር አካባቢ አስተዳደር ማቋቋሚያ አዋጅ

## PROCLAMATION NO. 76/2007

## SOMALI REGIONAL PROCLAMATION TO INSTITUTE WOREDA AND KABELE LOCAL ADMINISTRATION

Dhool Gazeeta Waxaa Soo Saara Golaha
Barlamaanka Deegaanka

## ***Bayaan Tirsi 76/2001***

### ***Bayaan ka aasaasidda maamulada degmooyinka iyo tuulooyinka dawlada deegaanka Soomaalida***

Ka dib markii ay lagama maarmaan noqotay in la sameeyo qaab-dhismeedyada maamulada degmooyinka iyo tuulooyinka, Lana siiyo dhaadhicin dhamaystiran (Complete Decentralization) oo la xidhiidha dhinacyada shaqada, awoodda, waajibaadka iyo adeegyada heerarka kala duwan ee maamuleed.

Iyada oo ay lagama maarmaan tahay in kor loo qaado maamulka suubban, lana xoojiyo dimuqraadiyadda, si loo hubiyo is-xukunka iyo la-xisaabtanka si ay adeeg bixintu iyo go'aan gaadhistuba ay u noqdaan kuwo gacanta ugu jira bulshada ay khusayso, loona hubiyo hanaan loo dhan yahay oo ah qorshaha horumarinta, miisaaniyadda ,go'aan gaadhista, cad cadaanta waxqabadka maamulada degmooyinka iyo tuulooyinka, sidoo kale in la hubiyo dhaga nuglaanta ama u jajabnaanta masuuliyiinta degmooyinka, tuulooyinka iyo adeeg-bixiyayaasha iyadoo si toos ah ay ula xisaabtamayso bulshada ay u adeegayaan iyo in la xaqiijiyo nabadgalyada iyo cadaaladda bulshada.

Maadaama ay haboon tahay in kor loo qaado awooda waxqabad ee bulshada, iyadoo la hubinayo Lana horumarinayo ka qayb-galkooda geedi socodka maamulada, si loogu suurta galiyo looguna dhiiri galiyo hanashada xuquuda iyo xilalka la xidhiidha horumarinta arimaha siyaasadda, dhaqaalaha iyo bulshadaba, islamarkaana loo hubiyo maarayn

meelmarineed oo ah dhinacayda adeeg bixinta, iyo in ay bulshadu yeeshaan dareen la haansho.

Maadaama la rumaysan yahay in kor loo qaado horumarka dhaqaalaha, cadaaladda iyo heerka nolosha iyadoo la' abuurayo jawi ku haboon, kobaca dhaqaalaha degmooyinka iyo tuulooyinka , sidoo kale iyadoo hoos loo dhigayo sinaan la'aanta deegaanada iyo dadka iyadoo si'gaar ah loo xoojinayo loona abaabulayo dhinacyada haweenka, dhalinyarada iyo qaybaha bulshada ee tabarta daran, si ay uga qayb qaataan dadaalka loogu jiro horumarka ayna u helaan adeeg hufan iyadoo la midaynayo hawlaha iyo adeegyada ay bixiyaan hay'adaha horumarka ku hawlan ee goobahaas.
Hadaba iyada oo uu golaha xildhibaanada deegaanku ka duulayo awooda distuuriga ah ee uu Siiyey qodobka 49(3) xarafkiisa (b) dibna loo habeeyay ayaa wuxuu soo saaray bayaankan Hoos ku cad:

# QAYBTA 1^AAD

# QODOBO GUUD

## Qodobka 1^aad Ciwaan Gaaban

Bayaankan waxaa loogu yeedhi karaa ", Bayaanka aasaasida maamulada degmooyinka iyo tuulooyinka dawlada deegaanka Soomaalida, bayaan tirsi 76/2001".

## Qodobka 2^aad Qeexid

si aan weedhaha e'raygu ku jiro si kale aan loo akhriyin waxaa bayaanka dhexdiisa loola jeedaa:-

1. ' DASTUUR' waxaa loo la jeedaa Dastuurka dib loo habeeyay ee (1994 ) ee dawlad deegaanka soomaalida.
2. 'MAAMUL' Waxaa loolajeedaa maamulada degmooyinka iyo tuulooyinka dawlad deegaanka soomaalida.
3. 'GOLAHA XILDHIBAANADA' Waxaa loo la jeedaa golayaasha xildhibaanada degmooyinka iyo tuulooyinka.
4. 'GOLAHA HAWL FULINTA' waxaa loo la jeedaa golaha fulinta ee maamulada degmooyinka iyo tuulooyinka.
5. 'GARSOORKA' Waxaa loo la jeedaa maxkamadaha degmooyinka iyo tuulooyinka.
6. 'MADAXA XAFIISKA GOLAHA XILDHIBAANADA' Waxaa loo la jeedaa mas'uulka maamulka xafiiska golaha xil-dhibaanada oo ay soo xulaan af hayeenada golaha degmada ama tuuladu kana ansixiyaan golaha xildhibaanada.

7. 'MADAXA XAFIISKA GOLAHA FULINTA' Waxaa loo la jeedaa xubnaha mas'uulka ka ah xafiisyada golaha fulinta degmada ama tuulooyinku ay soo magacaabaan gudoomiyaha degmada iyo tuuladu.

8. 'HOOS U DHAADHICIN' Waxaa loo la jeedaa awoodaha dastuuriga ee uu deegaanku siiyay degmooyinka iyo tuulooyinka.

9. 'JIRITAAN SHARCIYEED' Waxaa loo la jeedaa in ay maamulada degmooyinka iyo tuulooyinku leeyihiin sharciyad meeqaal oo ay wax ku dacwayn karaan laguna dacwayn karo islamarkaasna cid kale heshiis kula gali karaan la gulana gali karo.

10. 'AWAAMIIR IYO XEER NIDAAMEED' Waxaa loo la jeedaa amarada iyo xeer hoosaadyada ay soo saaraan golayaasha fulinta ee degmooyinka iyo tuulooyinku.

11. 'DAWLAD' Waxaa loola jeeda Dawlada Deegaanka Soomaalida

12. DAWLAD DEEGAAN HOOSAADKA Waxaa loo la jeedaa maamulka dhaqmooyinka iyo tuulooyinka.

13. TuulloWaxaa loo la jeedaa maamulka ugu hooseeya ee maamulka deegaanka.

## Qodobka 3aad Xadka Fulinta

Bayaankan waxaa ku dhaqmaya dhammaan maamulada degmooyinka iyo tuulooyinka

Deegaanka marka laga reebo magaalooyinka oo bayaano gaar ah lagu aasaasay

## Qodka 4aad **Qodobo Aasaasi ah**

Iyagoo la raacayo qodobada aasaasiga ah ee dastuurka fedraalka iyo Kan deegaankaba ayay dawladdu si loo xoojiyo maamulada degmooyinka iyo tuulooyinka waxay fulinaysaa oo uu waajibaad ka saaran yahay arimaha aasaaska u ah dhaadhicinta awooda oo ah:-

1. Dhaadhicinta awooda iyo khayraadka loo baahan yahay si loogu suurta galiyo degmooyinka iyo tuuulooyinka inay si hufan oo wax ku ool ah u gaadhaan ujeedooyinkooda.

2. In awood la siiyo degmooyinka iyo tuulooyinka si ay u uruurin karaan una abaabuli karaan khayraadkooda ay ku fulinayaan shaqooyinkooda.

3. Si loo dhiso qaabdhismeed haboon oo ay yeeshaan degmooyinka iyo tuulooyinka deegaanku, waa in laga taageero dhinacyada kobcinta awooda si loogu suurta galiyo in ay hawlahooda ugu gutaan si dimuqraadi ah, cadcadaan, la xisaabtan leh, iyo in ay bulshadu ka qayb qaataan.
4. In loo suurta galiyo sidii ay maamulada degmooyinka iyo tuulooyinku door hormuud leh oo hogaamineed uga qaataan horumarinta deegaankooda.

5. In si waafaqsan dastuurka iyo bayaankanba loogu sameeyo daba gal maamulada degmooyinka iyo tuulooyinka

6. In loo abuuro jawi saamaxaya nidaam is kaashi oo suurta galinaya sidii ay maamulada degmooyinka iyo tuulooyinku is kaga kaashan la haayeen danaha guud ee ay wadaagaan.

7. In qorshayaasha ay maamulada degmooyinka iyo tuulooyinku u jeexaan horumarinta goobahooda lagu garab galo farsamo ahaana lagu gacan siiyo iyadoo mudnaanta la siinayo goobaha taakulaynta gaarka ah u baahan ee dib u dhacay.

8. In maamulada degmooyinka iyo tuulooyinka lagu dhiiri galiyo islamarkaasna la isku xidho wada shaqaynta hay'addaha aan dawliga ahayn sida kuwa bulshada rayidka ah

9. In lagu dhiirigaliyo maamulada degmooyinka iyo tuulooyinka in ay ku dhaqmaan dimuqraadiyad isla marahaantaana ay tixgaliyaan bulshadooda gaar ahaan haweenka iyo kooxaha aan tixgalinta aan la siinin

10. In la joogteeyo horumarinta dib –u habaynta barnaamijka dhaadhicinta

# QAYBTA 2AAD

## Qaabdhismeedka Iyo Aasaasida Nidaamka maamulada degmooyinka iyo Tuulooyinka

### Qodobka 5 aad <u>Qaab-dhismeedka Guud</u>

Qaabdhismeedka maamulada degmoooyinka iyo tuulooyinka waxaa xeerin doona shuruucda uu golaha deegaanku ka soo saaro.

### Qodobka 6 aad <u>Heerarka Maamulka</u>

Heerarka Maamulada degmooyinka iyo Tuulooyinka deegaanku waxay noqonayaan sidan:-

1. Maamul Degmo Iyo.
2. Maamul Tuulo.

### Qodobka 7 aad <u>Meeqaanka Sharciyeed ee ay la haanayaan Maamuladu</u>

Maamulada degmooyinka iyo Tuulooyinku waxay yeelanayaan Meeqaan sharciyeed oo ay wax ku dacwayn karaan laguna dacwayn karo isla markaana ay sharciyadooda cid saddexaad heshiis kula gali karaan lagulana gali karo.

### Qodobka 8aad <u>Tirada Dagmooyinka</u>

Tirada iyo Xuduudaha Maamulada Degmooyinka iyo Tuulooyinka iyadoo bayaankan uu u aqoonsan yahay siday hada ka hor ahaayeen waxay Dawlada Deegaanka Soomalida ka kooban tahay tirada degmooyinkan hoos ku cad:-

| No | Maamul Degmo | | |
|---|---|---|---|
| 1 | Degmada. Afdam | 27 | Degmada Shiniile |
| 2 | Degmada. Hargeelle | 28 | Degmada. Sheygoosh |
| 3 | Degmada. Awaare | 29 | Degmada Shilaabo |
| 4 | Degmada Aw barre | 30 | Degmada. Caddaadle |
| 5 | Degmada. Ayshaca | 31 | Degmada. Ceel kare |
| 6 | Degmada. Iimay Barri | 32 | Degmada Garbo |
| 7 | Degmada. Iimay Galbeed | 33 | Degmada Gashaamo |
| 8 | Degmada. Erer | 34 | Degmada. Gursum |
| 9 | Degmada. Baabili | 35 | Degmada. Gooro- baqaqsa |
| 10 | Degmada Baarey | 36 | Degmada. Gallaadi |
| 11 | Degmada Bookh | 37 | Degmada Go'dey |
| 12 | Degmada. Jarati | 38 | Degmada. Gura-dhaamoole |
| 13 | Degmada. Jig Jiga | 39 | Degmada. Guna Gado |
| 14 | Degmada. Xamaro | 40 | Degmada. Fiiq |
| 15 | Degmada. Xarshin | 41 | Degmada. Fiiltu |
| 16 | Degmada. Dambal | 42 | Degmada. Feer feer |
| 17 | Degmada Danood | 43 | Degmada. Qabri dahar |
| 18 | Deg.Dhagax-buur | 44 | Degmada. Qabribayax |
| 19 | Degmada. Dhagax-madow | 45 | Degmada Qallaafo |
| 20 | Degmada. Dhanaan | 46 | Degmada. Laga hida |
| 21 | Degmada. Dhoobo- wayn | 47 | Degmada. Mayu Muluqo |
| 22 | Degmada. Doolo -Addo | 48 | Degmada. Ma'ayso |
| 23 | Degmada. Doolo- Baay | 49 | Degmada Mooyaale |
| 24 | Degmada. Dhuxun | 50 | Degmada. Mustaxiil |
| 25 | Degmada. Sallaxaad | 51 | Degmada. Hudat |
| 26 | Degmada. Sagag | 52 | Degmada. Wardheer |

## Qodobka 9aad Wax kabadalida Xuduudaha Dawlad Deegaan-Hoosaadka

1. Iyadoo sideeda uu ahaanayo qodobka kor ku xusan wuxuu golaha xildhibaanada deegaanku bayaan ku aasaasi Kara, qaybin Kara, isku dari Kara, dib u kala xadayn Kara ama baabi'in Kara xuduudaha degmo ama tuulo.
2. Marka uu golaha Deegaanku fulinayo qaybta 1aad ee qodobkan waxay wax ka waydiinayaan hab-raaca iyo tafaasiirta la xidhiidha xuduudaha tuulooyinka hoosyimaada degmada iyagoo la tashanaya dadka degaanka degmooyinka iyo tuulooyinka ay khusayso.
3. Marka la go'aaminayo aasaasida ama qaybinta dawlad deegaan-hoosaadka waa in xafiiska masuulka ka ah dowlad deegaan-hoosaadkaas, isagoo ka duulaya daraasaad uu samaynayo xafiiska maaliyada iyo horumarinta dhaqaalaha iyo xafiisyada kale ee ay khusayso, ay warbixin siiyaan golaha deegaanka.

## Qodobka 10aad Shuruudaha Aasaasida degmo iyo Tuulooyinka

Iyaduu sideeda uu ahaanayo qodobka 8aad ee kor ku xusan waxaa degmo ama tuulo la aasaasi karaa:

1. Degmo

   b) Iyada oo la eegayo tirada dadwaynaha ku nool agaas oo uu xeerin doono golaha xildhibaanada DDS hadba sidii loogu baahdo.

t) Waa in ay soo saari karaan dakhli aan ka yarayn Hadaba inta uu golaha xildhinnaadu u arko.

j) Waa in habka ay u degan yihiin uu ku haboon yahay adeeg bixinta.

x) Waa in loo tix galiyaa rabitaanka shacabka.

## 2. Tuulo

b) Iyada oo la eegayo tirada dadwaynaha ku nool taas oo xeerin doono hadba sidii loogu baahdo golaha xildhibaanada DDS.

t) Waa in habka ay u degan yihiin uu ku haboon yahay adeeg bixinta iyo rabitaanka shacbiga.

## Qodoba 11^aad Magac Bixinta Maamulada Degmooyinka Iyo Tuulooyinka

1. Degmo ama Tuulo kasta oo cusub waxaa magac bixinteeda ama wax ka badalkiisaba iska leh golaheeda xildhibaanada.

2. Magac bixinta cusub ama wax ka badalka mid horey u jiray waa in lagu daabaca waragayska dawlada deegaanka (Dhool Gazeta).

3. Dhammaan hantida iyo daynta, ama xuquuqda iyo xilalkii degmadu ama tuuladu waxay ku wareegayaan degmada ama tuulada cusub.

### Qodobka 12aad <u>Muranka Xuduudaha</u>

Muranka ama ismaan- dhaafka ka dhasha soohdimaha (xuduudaha) u dhexeeya degmooyinka ama tuulooyinka waxaa go'aaminaya golaha xil dhibaanada ee deegaanka.

### Qodobka 13aad <u>Wada Shaqaynta Maamulada Degmooyinka Iyo Tuulooyinka</u>

Laba dagmo ama tuulo ama in ka badan ayaa waxay yeelan karaan iskaashi iyagoo abuuranaya golayaal u gaar ah, sanduuq lacageed ama mashaariic wax wada qabsi si ay u gaadhaan ujeedooyinkooda horumarineed iyo adeeg bixin waxaana ansixinaya golaha xildhibaanada deegaanka.

# QAYBTA 3AAD

## Qaab-Dhismeedka Iyo Qaybsanaanta Awooda Degmada

### Qodobka 14 aad <u>Qaab-Dhismeedka Degmada</u>

Qaab-dhismeedka heer degmo sida uu dhigayo qodobka 74 ee dastuurka dib loo habeeyay ee deegaanka wuxuu ka koobnaan hayadahan hoos ku xusan.

1. Golaha xildhibaanada ee degmada,
2. Golaha fulinta iyo
3. Maxkamada heer degmo /golaha garsoorka

## Qodobka 15aad Golaha xildhibaanada ee degmada

1- Degmo kasta waxay yeelan Gole xildhibaano degmo oo sida ku cad qodobka 75aad ee dastuurka Gole laga hoos dhisay Golaha Deegaanka.

2- Golahan isla sida uu dhigayo qodobka 75aad firqadiisa (2) ee dastuurka waxaa dhisaya wakiilo shacab oo matalaya tuulooyinka ay ka kooban tahay degmadu, kaas oo yeelanaya Af hayeen, Af hayeen ku xigeen iyo gudiyo joogta ah iyo kuwo aan joogta ahaynba hadba sidii loogu baahdo.

3- Golaha xildhibaanada ee degmadu waxay u hoggaansamaan Dastuurka, shacabka iyo damiirkoodaba.

## Qodobka 16aad Waajibaadka Xubnaha Golaha xildhibaanada ee Degmada

Xubin kasta oo Golaha xildhibaanada degmada ka tirsan waxaa shakhsi ahaan u saran wajibaadyadan:-

1. In uu xidhiidh joogta ah la yeesho shacabka deegaanka laga soo doortay islamarkaana uu kala tashado arimaha mudnanta leh in lagu soo qaado kal-fadhiga Golaha xildhibaanada ee degmada.
2. Waa in uu ka qayb galaa kulamada golaha iyo gudiyada uu xubinka ka yahay.
3. Waa in uu ka qayb qaataa hawlaha guud iyo kuwa horumarineed ee goobta laga soo doortay iyo tan guud ee degmadaba.
4. Waa in uu dareensanyahay danta qaranka markasta oo uu xilkiisa gudanayo.

## Qodobka 17$^{aad}$ Shuruudaha Musharaxnimo

Qofka isku sharaxaya xubinimada golaha degmada iyadoo sideeda uu u buuxinayo guud ahaan Shuruudaha lagu xeeriyey dastuurka iyo qawaaniinta doorashooyinka, waa in uu gaar ahaana buuxiyaa kuwan hoos ku xusan:-

1. Waa in uu yahay muwaadin deegaanka u dhashay islamarkaana yaqaana luqada soomaaliga.
2. Waa in uu ka madax bannaan yahay argtida ururada ka soo horjeeda dasduurka nabadoodka.

## Qodobka 18$^{aad}$ Tirada Xubnaha Golaha Degmada

Tirada xubnaha xildhibaanada golaha degmadu waa sida ku cad xeerka go'aaminta xubnaha golaayasha heerarka kala duwan ee deegaanku.

## Qodobka 19$^{aad}$ Mudada Shaqo ee Xubnaha Golaha

1. Mudada shaqo ee golaha xildhibaanada degmadu waxay noqon Shan sano sida uu dhigayo qodobka 80(3) ee dastuurku.
2. Iyadoo sideeda uu yahay qodob hoosaadkan sare xubinka sifooyinka kala duwan ku waaya xubinimada golaha islamarkaasna sida uu xeerinayo sharciga doorashooyinku xubinnimadiisii lagu badalo cid kale, waxay mudada xubinka cusubi noqonaysaa intii xubinka uu badalay u hadhsanayd oo kaliya.

**Qodobka 25 [aad] Luminta Xubinimada Golaha**

Xubinimada golaha degmada wuxuu xubinku ku waayi karaa marka ay jiraan mid ka mid ah arimahan Hoos ku xusan:-

1. Marka lagu qabto isagoo faraha kula jira faldambiyeed culus.
2. Marka dadkii soo doortay ay kala noqdaan kalsoonidii hab wafaaqsan sharciga.
3. Marka loo doorto xubinnimada golayaasha heer deegaan ama fedaraal.
4. Marka uu geeriyoodo.

**Qodobka 26[aad] Guddiyada Joogtada ah ee Golaha Degmada**

1. Golaha xildhibaanada degmadu si uu xilka iyo waajibaadka ka saaran u guto wuxuu dhisayaa guddiyo joogta ah oo uu midkiiba ka kooban yahay xubno aan tiradoodu ka yarayn Shan xubnood.
2. Guddiyada joogtada ahi waxay hoos tagaan Af- hayeenka golaha xildhibaanda degmada.
3. Tirada guddiyada, hoogaamintooda iyo hanaanka shirarka waxaa go'aamin doona golaha xildhibaanada.
4. Guddiyadu waxay si joogta ah u kor meerayaan miisaaniyada iyo hawlaha kale ee xafiisyada, waxayna si joogta ah ula soconayaan shaqooyinkii loo xilsaaray.
5. Guddiyadu waxay talo iyo tusaale ka siin karaan maamulka degmada wax yaabihii ay koormeerka ku soo arkeen.

ansixintoodaba ay leeyihiin xubnaha golaha ee haysta kuraasta ugubadan ee golaha.

2. Afhayeenku wuxuu u hogaansamaa golaha, sharciga dadkiisa iyo damiirkiisaba.

## Qodobka 23aad <u>Awoodaha iyo Waajibaadka Af-hayeenka</u>

1. Sida uu dhigayo qodobka 78(2) ee dastuurku iyadoo awoodaha iyo waajibaadka uu leeyahay af-hayeenka hadba siday ku haboon tahay loogu adeegsanayo awoodaha la gudboon ee uu af-hayeenka golaha degaanka dastuurku siiyay ayaa wuxuu sidoo kalena isku duba rida hawlaha gudiyada joogtada iyo kuwaan joogtada ahayn ee golaha xildhibaanada degamada.

2. Af-hayeenku wuxuu hoos tagayaa golaha xildhibaanada degmada.

3. Wuxuu dhaariyaa xubnaha cusub ee xilalka loo dhiibayo.

## Qodobka 24aad <u>Awoodaha iyo Waajibaadka Ku xigeenka Afhayeenka</u>

1. Wuxuu Af- hayeen ku xigeenku qabanayaa hawlaha ay sida gaarka ah ugu xilsaaraan Af-hayeenka iyo golaha degmadu, sidoo kale wuxuu matalayaa marka uusan joogin ama uusan af- hayeenku gudan Karin xilka iyo waajibaadkiisa.

2. Wuxuu hoos tagayaa af-hayeenka dagmada iyo golaha degmada.

**Qodobka 25 aad** **<u>Luminta Xubinimada Golaha</u>**

Xubinimada golaha degmada wuxuu xubinku ku waayi karaa marka ay jiraan mid ka mid ah arimahan Hoos ku xusan:-

1. Marka lagu qabto isagoo faraha kula jira faldambiyeed culus.
2. Marka dadkii soo doortay ay kala noqdaan kalsoonidii hab wafaaqsan sharciga.
3. Marka loo doorto xubinnimada golayaasha heer deegaan ama fedaraal.
4. Marka uu geeriyoodo.

**Qodobka 26aad** **<u>Guddiyada Joogtada ah ee Golaha Degmada</u>**

1. Golaha xildhibaanada degmadu si uu xilka iyo waajibaadka ka saaran u guto wuxuu dhisayaa guddiyo joogta ah oo uu midkiiba ka kooban yahay xubno aan tiradoodu ka yarayn Shan xubnood.
2. Guddiyada joogtada ahi waxay hoos tagaan <u>Af- hayeenka</u> golaha xildhibaanda degmada.
3. Tirada guddiyada, hoogaamintooda iyo hanaanka shirarka waxaa go'aamin doona golaha xildhibaanada.
4. Guddiyadu waxay si joogta ah u kor meerayaan miisaaniyada iyo hawlaha kale ee xafiisyada, waxayna si joogta ah ula soconayaan shaqooyinkii loo xilsaaray.
5. Guddiyadu waxay talo iyo tusaale ka siin karaan maamulka degmada wax yaabihii ay koormeerka ku soo arkeen.

## Qodobka 27^aad Guddiyada ku meel gaadhka ah ama Aan Joogtada Ahayn

4. Golaha degmadu wuxuu dhisi karaa gudiyo aan joogto ahayn haduu u arko lagama maar maan wuxuna siinayaa shaqooyin xadidan oo wakhti ku eg.

5. Shuruuda xubinimada, shirarka, shaqooyinka iyo awoodaha gudiyadan waxaa go'aaminaya golaha.

## Qodobka 28^aad Xafiiska Golaha Xildhibaanada Degmada

1. Sida uu dhigayo qodobka (81) ee dastuurku golaha xildhibaanada degmadu wuxuu yeelan xafiis u gaar ah.
2. Awoodaha iyo waajibaadka xafiiska sharci ayaa lagu xeerin.

## Qodobka 29^aad Awoodaha IyoWaajibaadka Golaha Xildhibaanada Degmada

Sida uu dhigayo qodobka 77 ee dastuurka farqadiisa (2) awoodaha iyo waajibaadka lagu siiyay iyadooy sidooda yihiin goluhu wuxuu yeelanayaa awoodaha iyo waajibaadyadan soo socda .

1. Wuxuu xaqiijinayaa meel marinta mashaariicda iyo barnaamijyada degmada ee ay u soo gudbiyaan gudiga fulinta ee degmada iyagoo ay u kala horumarinayaan siday u kala mudan yihiin .

2. Wuxuu daba gal ku sameeyaa islamarkaana qiimeeya warbixinta waxqabadka ee gudoomiyaha, golaha fulinta iyo mas'uuliyiinta kale ee xafiisyada degmada .

3. Wuxuu dhagaystaa warbixinada hanti dhawrka ay u soo gudbiyaan golaha fulinta iyo gudiga joogtada ah ee hanti dhawrka iyo miisaaniyada ee golaha xildhibaanada wuuna ka dooda islamarkaana go'aanka ku haboon ka qaataa .

4. Wuxuu u kuur galaa oo uu go'aamiyaa nuqulka hore ee awaamiirta ay u soo gudbiyaan gudiga fulintu.

5. Wuxuu ka doodaa oo uu ansixiyaa warbixinta maxkamada garsoorka degmada.

6. Wuxuu xubnihiisa u soo saaraa xeer hoosaad qoran

7. Wuxuu dadweynaha si gaar ah u gala tashadaa arimaha ahmiyada gaarka ah u leh.

## Qodobka 30aad Shirarka Golaha Degmada

Shirarka golaha degmadu waxay u qabsoomayaan sida ku xusan qodobka (80) firqooyinkiisa (1) (2) iyo (4) ee dastuurka.

## Qodobka 31aad Go'aanad Golaha

Iyadoo sida uu dhigayo loo raacayo qodobka 80 (2)aad ee dastuurka. Marka go'aanka codadka xildhibaanadu tiro ahaan isku mid noqdaan waxaa lagu go'aan qaadanayaa dhinaca uu af- hayeenku raaco.

**Qodobka 32aad** **Golaha hawl fulinta ee Degmada**

Degmadu waxay yeelan sida ku cad qodobka 82(2) ee dastuurka gole hawl fulineed oo hoos tagaya gudoomiyaha iyo golaha degmada.

**Qodobka 33aad** **Xubnaha Golaha Fulinta Degmada**

Xubnaha golaha fulinta ee dagmadu waxay ka koobanaanayaan xubnaha lagu xusay qodobada (82) ee dastuurka iyo qodobka 28aad ee Bayaanka tirsigiisu yahay 64/2000 iyo wixii dib u habeeyn ah ee lagu sameeyo.

**Qodobka 34aad** **Shuruudaha Xulashada Xubnaha Golaha Fulinta Degmada**

Shuruudaha xulashada xubnaha gudiga, mudada ay xilka haynayaan iyo sababaha ay ku waayayaanba waxay la mid tahay kuwa lagu xusay qodobada 17aad, 19aad iyo 25aad ee bayaankan sida ay u kala horeeyaan.

**Qodobka 35aad** **Mudada Shaqo ee Golaha Fulinta Degmada**

Mudada shaqo ee Golaha Fulintu waxay la mid tahay mudada shaqo ee golaha xildhibaanada degmada.

**Qodobka 36aad Awoodaha iyo Waajibaadka Guddiga Fulinta Degmada**

1. Awoodaha iyo waajibaadka golaha fulintu wuxuu yeelanayaa xilka iyo waajibaadka lagu xusay qodobka (83) aad ee dastuurka.

2. Iyadoo sideeda uu ahaanayo awoodaha lagu xusay qodob hoosaadkan kor ku xusan wuxuu golaha fulintu yeelanayaa:

   b. Wuxuu ansixiyaa mas'uuliyiinta ka baxsan xubnaha golaha fulinta marka uu guddoomiyuhu soo hor dhigo.

   t. Wuxuu xaqiijiyaa kormeerka iyo qiimaynta mashaariicda iyo barnaamijyada horumarineed ee dagmada laga fuliyay.

   j. Wuxuu sameeyaa in dayactir lagu sameeyo kaabayaasha horumarinta aasaasiga ah ee degmada ku yaala.

   x. Wuxuu daba gala islamarkaana kor ka kala socdaa hanaanka adeeg bixinta bulshada loo fidiyo.

   kh. Wuxuu illaaliyaa islamarkaana dhawraa hidaha iyo waxyaabaha kale ee taariikhiga ah.

   d. Wuxuu warbixin ka siiya hay'adaha ay khusayso dhibaatooyinka ka hor yimaada habsami u fulinta mashaariicda iyo barnaamijyada dawlada fedaraalka iyo deegaanka.

r. Waxaa isagoo ka duulaya awoodaha la siiyay gaar ahaan kuwa la xidhiidha miisaaniyada waxaa uu siiyaa illo dakhli maamulada tuulooyinka, ururada iyo hay'adaha kala duwan si ay qorshayaashooda ugu gutaan.

s. Wuxuu isagoo ka duulaya awoodaha la siiyay heshiisyo la galaa shaqsiyaad, hay'adaha dawliga ah iyo kuwaan dawliga ahaynba.

sh. Wuxuuu fuliyaa waajibaadyada kale ee shuruucda kala duwan lagu qeexay.

## Qodobka 37aad Shuruudaha Xulashada Guddoomiyaha Degmada

Shuruudaha xulashada gudoomiyaha degmadu iyadoo sideeda uu yahay qodobka (84aad) firqadiisa (1aad) ayaa lagu xulan shuruudaha kaluu xeeriyay qodobka 17aad ee bayaankan.

## Qodobka 38aad Codka Magacaabista Guddoomiyaha Degmada

1. Magacaabista Gudoomiyaha Degmada waxaa la raaci sida uu dhigayo qodobka 84(1) aad ee dastuurka.
2. Mudada shaqo ee guddoomiyaha waxay noqonaysa-mudada shaqo ee golaha xildhibaanada.

## Qodobka 39aad Diwaan Galinta Hantida Xubnaha Golaha Fulinta

Xubnaha golaha hawl fulinta ee dagmadu dhammaantood inta aysan bilaabin xilalka loo magacaabay waa in ay xafiisyada awoodaha sharciyeed u leh ka diwaan galiyaan hantida ay shaqsi ahaan u leeyihiin.

## Qodobka 40aad Awoodaha iyo waajibaadka Gudoomiyaha Degmada

1. Gudoomiyaha Degmadu isagoo hoos tagaya madaxwaynaha dawlada iyo Golaha xildhibaanada degmada ayaa wuxuu yeelanayaa awoodaha uu siinayo qodobka 85aad ee dastuurka.
2. Iyadoo sidiisa uu ahaanayo sida ku xusan firqada hore ee qodobkan Kor ku xusan gudoomiyuhu:
3. Wuxuu warbixin ku saabsan wax qabadka golaha hawl fulinta iyo xafiisyada kale u gudbiyaa golaha xildhibaanada degmada iyo madaxwaynaha.
4. Wuxuu shir iskugu yeedha gudoomiyaana golaha hawl fulinta degmada.
5. Wuxuu si ay cad cadaani ku dheehantahay shacabka ugu furaa fagaarayaal uu kaga warbixinayo qaabka isticmaalka miisaaniyada iyo adeeg bixinta ee maamulka degmada.

6. Wuxuu isku duba rida islamarkaana ka taakuleeyaa hawlaha golaha fulinta ee tuulooyinka.
7. Wuxuu gutaa hawlaha kale ee ay u xilsaaraan golaha xildhibaanada degmadu iyo madaxwaynuhu.

## Qodobka 41aad <u>Waajibaadka Ku Xigeenka Gudoomiyaha Degmada</u>

Magacaabista, awooda iyo waajibaadyada ku-xigeenka iyo cida uu hoos tagayo wuxuu noqonayaa sida uu xeerinayo qodobka 86aad dastuurku.

## Qodobka 42aad <u>Shirarka golaha fulinta ee Degmada</u>

1. Shirarka golaha fulinta ee degmadu wuxuu u qabsoomaa sidan:

   b/ Golaha fulinta ee degmadu waxay shirkooda joogtada ah yeelanayaan toodobaadkiiba' hal maalin.

   t/ Iyadoo la raacayo awaamiirta uu siiyo guddoomiyaha degmadu ayuu madaxa xafiiska golaha hawl fulintu uu golaha shir iskugu yeedhaa.

   j/ Hadii ay dhacdo in uu gudoomiyaha degmadu iskugu yeedhi waayo muddo bil ah waxay xubnaha goluhu oo dhan saddex meelood oo hal meel codsan karaan in uu madaxa xafiiska goluhu shir in uu iskugu yeedho.

x/ Shirarka golaha waxaa hoggaminaya guddoomiyaha, marka uusan jooginna ku -xigeen kiisu, sidoo kale marka uusan ku- xigeenku jooginna cida uu wakiisho.

Kh/ Shirarka goluhu wuxuu qabsooma marka ay joogan xubnaha goluhu saddex meelood labbo meel.

d/ Isagoo bayanka raacaya wuxuu goluhu soo saaran karaa awaamir khuseeya qaab socodka shirarkiisa.

## 2. *Go'aanada golaha hawl fulinta*

Go'aanada ay si wada jirka ah u gaadhaan golaha hawl fulintu waxaa ka wada saaran mas'uuliyad wadareed.

***Qodka 43aad*** ***<u>Waajibaadka Madax-Xafiiseedka ee Maamulka Degmada</u>***

Iyadoo sidiisa uu ahaanayo sida uu dhigayo qodobka 87aad ee dastuurku wuxuu madaxa xafiiska maamulka degmadu yeelanayaa:

1. Madaxa xafiisku wuxuu hoos tagayaa gudoomiyaha dagmada

2. Wuxuu gudoomiyaha u gudbiyaa hawl maalmeedka si uu shaqadiisa ugu guto sida ugu haboon

3. Wuxuu hantaa islamarkaana ilaaliyaa go'aanada gudiga fulinta degmada iyo guddiyadda kale.

4. Wuxuu diyaariyaa una gudbiyaa gudoomiyaha qorshe sanadeedka iyo miisaaniyada, una fuliyaa marka la ansixiyo.

5. Wuxuu fuliyaa qorhse sanadeedka shaqada ee la ansixiyay iyo miisaaniyada.

6. Wuxuu xaqiijiyaa in xisaabaadka iyo lacagaha cadaanka ahba loo maamulo si waafaqsan xeerka maamulka maaliyadda.

7. Wuxuu warbixinta miisaaniyada oo xilliile ah siiyaa gudoomiyaha, gudiga fulinta iyo gudiyada kale m.

8. Wuxuu xafidaa oo daryeelaa dhammaan hantida guurtada ah iyo tan maguuratada ah ee xafiiska gudoomiyaha.

9. Wuxuu fuliyaa shaqooyinka kale ee uu gudoomiyuhu u xilsaaro.

**Qodka 44$^{aad}$ <u>Sifooyinka Shaqo ka taga Guddoomiyaha</u>**

Guddoomiyuhu wuxuu shaqada ama xubinnimada golaha fulinta ku waayi karaa sifooyinkan soo socda:-

1. Markii la ogaado in karti darro awgeed uusan shaqadiisa gudan Karin.

2. Marka lagu tuhmo in uu galay ama ku lug leeyahay fal dambiyeedyo culus, musuq maasuqa iyo nabaddiidnimo.

## Qodka 45aad <u>Aasaasida Xafiiska Heer Degmo</u>

Iyadoo ujeedadu ay tahay fulinta waajibaadka dawladda, waxay maamulada degmooyinka ee lagu qeexay dastuurka iyo bayaankanba ay degmo kasta yeelanaysaa xafiisyo heer degmo ah.Magaca, tirada iyo waajibaadka shaqo ee xafiisyada heer degmo waxaa qeexi doona sharci.

# QAYBTA 4AAD

# Awoodda Iyo Qaab-Dhismeedka Tuulada

## Qodobka 46aad <u>Maamulka Tuulooyinka</u>

1. Sida uu dhigayo qodobka 89(2)aad ee dastuurka, waxaa bayaankan lagu asaasay maamulka tuulooyinka joogtada ah ee maamul dawladeedka ugu hooseeya.
2. Sida uu qeexayo qodob hoosaadka sare ee maamulka Tuulooyinku, wuxuu hoos Tagayaa hadba sida qaabdhismeedku yahay maamulka magaalada ama maamulka Degmada.

## Qodobka 47aad <u>Hay'adaha Maamulka Tuulooyinka</u>

Sida uu qeexayo qodobka 89aad farqadiisa (3aad) ee dastuurka, qaab dhismeedka maamulka tuuladu wuxuu ka koobnaanayaa Golaha xildhibaanada

tuulada, Golaha maamulka iyo Maxkamada bulshada.

## Qodobka 48aad <u>Golaha Tuulada</u>

1. Sida ku cad qodobka 90aad ee dastuurka, tuulooyinku waxay yeelanayaan gole tuulo oo xubnihiisa si toos ah looga soo dehexdoortaa dadwaynaha tuuulada.
2. Xubnaha golahu waxay hoos tagayaan shacabkii soo dortay.
3. Goluhu wuxuu yelanayaa afhayeen, af hayeen ku- xigeen iyo gudiyo joogta ah iyo kuwaan joogta ahaynba.

## Qodobka 49 aad <u>Shuruuda Xulashada Musharixiinta</u>

Shuruudaha lagu xusay qodobka 17aad ee bayaankan ayaa lagu dhaqmi

## Qodobka 50aad <u>Tirada Xubnaha Golaha</u>

Tirada xubnaha golaha tuuladu waa siada u dhigayo bayaanka go'aaminta go'aalayaasha heerarka kala duwan ee deegaanka.

## Qodobka 51aad <u>ka qaybgalayaasha aan Xubnaha ahayn Codkana ku Lahay Kal fadhiga:</u>

Kal fadhiyada Golaha tuulada waxaa ka qayb gali Kara xubno iyo Marti sharaf aan cod lahayn,

kuwaas oo uu ogolaanshaha ka qayb galkooda bixinayo af hayeenka golaha tuulada:-

1. Xubnaha gudiga fulinta tuulada ee aan xubnaha ka ahayn golaha tuulada.
2. Wakiilada horumarinta iyo shaqaalaha fidinta waxbarshada iyo caafimaadka ee ka hawlgala tuulada.
3. Afhayeenku waxaa kale oo shirarka ku Marti qaadi karaa xubno ka tirsan ururada bulshada.

**Qodobka 52aad Mudada Shaqo ee Golaha**

Mudada shaqo ee goluhu waxay la mid noqonaysaa mudada shaqo ee golaha degmada.

**Qodobka 53aad Anshaxa Xubnaha Golaha Tuulada**

Anshaxa xubnaha goluhua waxaa lagu xeerin sharci.

**Qodobka 54aad Awoodaha Iyo Waajibaadka Golaha Xildhibaanada Tuulada**

1. Golaha xildhibaanada tuuladu wuxuu lahaanayaa awoodaha iyo waajibaadada lagu siiyay qodobka 91aad ee dastuurka.
2. Iyadoo sideeda ay yihiin awoodaha iyo waajibaadka qodob hoosaadkan kor ku xusan ayaa wuxuu goluhu lahaanayaa:-

   b) Wuxuu si balaadhan uga qayb galiyaa, kuna dhiiri galiyaa inay dadwaynaha tuuladu kaalin ku la haadaan diyaarinta, fulinta iyo qiimaynta qorshayaasha horumarineed.

u) Wuxuu ansixiyaa qorshayaasha horumarineed ee tuulada.

i. Wuxuu taaba galiyaa qorshayaasha iyo mashaariicda horumarineed ee tuulada.

x) Wuxuu daba gal ku sameeyaa, islamrkaana qiimeeya fulinta qorshayaasha iyo mashaariicyada horumarineed, sidoo kale wuxuu go'aan ka soo saaraa natiijada ka soo baxda iyagoo maamulka dagmada kala tashanaya.

kh) Wuxuu go'aamiyaa xidhiidhada ay lahaan karaan maamulka tuulada iyo gudiyada golahu.

d) Wuxuu ka doodaa islamarkaasna ansixiyaa xeer hoosaadyada qabyada ah ee uu golaha fulintu u soo gudbiyo.

r) Wuxuu xubnaha golaha u soo saaraa xeer hoosaadyada la xidhiidha anshaxa.

s) Wuxuu ka doodaa islamrkaana ansixiyaa warbixinta waxqabadka maxkamada bulshada ee tuulada.

sh) Wuxuu tashi gaar ah ka yeeshaa arrimaha ahmiyada gaarka ah u leh dadwaynaha tuulada.

dh) Wuxuu daba galaa islamrkaana qiimeeyaa waxqabadka guddoomiyaha iyo golaha fulinta ee degmada.

## Qodobka 55[aad] Af hayeenka iyo Af hayeen ku xigeenka golaha Tuulada

Sida ku cad qodobka 92aad ee dastuurka golaha tuulada, waxaa hoogaamiya af hayeenka iyo af hayeen ku xigeenka laga dhex doorto golaha, iyadoo uu ururka ama ururada siyaasadeed ee aqlabiyada ku leh golaha ay soo jeedinayaan goluhuna ansixinayo.

### *Qodobka 56[aad] Awoodaha iyo Waajibaadka Afhayeenka Tuulada*

1. Wuxuu isugu yeedhaa, gudoomiyaana shirarka caadiga ah iyo kuwa aan caadiga ahayn ee golaha tuulada.
2. Wuxuu diyaariyaa ujeedada shirka oo uu raacaa marka shirku furmo.
3. Wuxuu xaqiijiyaa in la qoro go'aanada shirka islamarkaana la ilaaliyo dukumiintiyada oo dhan.
4. Wuxuu wakiil uga yahay golaha, dhammaan xidhiidhada uu la yeelanayo dhinacyada kale.
5. Wuxuu fuliyaa talaabooyin dhinaca anshaxa ah ee goluhu ka gaadho xubnihiisa.
6. Wuxuu xidhiidhiyaa gudiyada joogtada ah iyo kuwa aan joogtada ahaynba ee golaha.
7. Wuxuu gutaa hawlaha kale ee uu goluhu u xilsaaro.

### Qodobka 57[aad] Awoodaha iyo Waajibaadka Kuxigeenka Afhayeenka Tuulada

1. Wuxuu fuliyaa hawlaha afhayeenku u xilsaaranyahay marka uu afhayeenku maqan yahay ama uu gudan waayo xilkiisa .
2. Wuxuu gutaa shaqooyinka kale ee uu afhayeenku u xilsaaro.

## Qodobka 58aad Guddiyada Joogtada ah ee golaha Tuulada

1. Golaha xildhibaanada tuuladu si uu xilka iyo waajibaadka ka saaran u guto wuxuu dhisayaa guddiyada joogtada ah oo uu midkiiba ka kooban yahay xubno aan tiradoodu ka yarayn Shan xubnood.

2. Gudiyada joogtada ahi waxay hoos tagaan afhayeenka golaha xildhibaanada tuulada.

3. Tirada gudiyada, hoogaamintooda iyo hanaanka shirarka waxaa go'aamin doona golaha xildhibaanada.

4. Gudiyadu waxay si joogta ah u kor meerayaan miisaaniyada iyo hawlaha kale ee xafiisyada, waxayna si joogta ah ula soconayaan shaqooyinkii loo xilsaaray.

5. Guddiyadu waxay talo iyo tusaaleba ka siin karaan maamulka tuulada wax yaabihii ay koormeerka ku soo arkeen.

## Qodobka 59aad Guddiyada ku meel gaadhka ah ama Aan Joogtada Ahayn

1. Golaha tuuladu wuxuu dhisi karaa gudiyo aan joogto ahayn haduu u arko Lagama maarmaan, wuxuuna siiyaa shaqooyin xadidan oo wakhti ku eg.

2. Shuruuda xubinimada, shirarka, shaqooyinka iyo awoodaha gudiyadan waxaa Go'aamiya golaha.

## Qodobka 60 aad Xafiiska Golaha Xildhibaanada Tuulada

1. Golaha xildhibaanada tuuladu wuxuu yeelan xafiis u gaar ah.

2. Awoodaha iyo waajibaadka xafiiska golaha xildhibaanada sharci ayaa lagu xeerin doonaa.

## Qodobka 61 aad Luminta Xubinimada Golaha

Sida uu xeerinayo qodobka 48(5) (6) wuxuu xubinku waayi karaa Xubinimada golaha tuulada marka ay jiraan mid ka mid ah sababahan Hoos ku xusan:-

1. Marka lagu qabto isagoo faraha kula jira faldambiyeed culus.
2. Marka dadkii soo doortay ay kala noqdaan kalsoonidii sida dastuurka waafaqsan.
3. Marka loo doorto xubinnimada golayaasha heer degmo, deegaan ama fadraalka.
4. Marka uu xubinku geeriyoodo.
5. Marka uuxubinka iska casilo xilkii uu hayay lagana aqbalo.

## Qodobka 62aad Golaha Fulinta ee Tuulada

Golaha fulintu waa hay'ada maamul ee lagu xusay qodobka 93aad ee dastuurka.

## Qodobka 63 aad Xubnaha Golaha Fulinta ee Tuulada

1. Xubnaha golaha fulinta ee tuuladu waxay ka kooban yihiin xubnaha lagu xusay qodobka 93aad (1) aad ee dastuurka iyo bayaanka tirsi ee 18/1994.

2. Sida uu xusayo dastuurku golaha fulinta tuuladu, wuxuu hoostagaa golaha tuulada iyo golaha maamulka degmada.

## Qodobka 64aad Diiwaangalinta Hantida Xubnaha Gudiga Fulinta ee Tuuladu

Dhamaan xubnaha gudiga fulinta tuuladu waa inay hantidooda ka diiwaan galiyaan xafiisyada ay khusayso ee sharcigu xeerinayo ka hor intaanay la wareegin xafiiska loo xilsaarayo.

## Qodobka 65 aad Awoodaha iyo Waajibaadka Golaha Fulinta ee Tuulada

Awoodaha iyo Waajibaadka Golaha Maamulka Tuuladu iyadoo uu ahaanayo sida ku xusan qodobka 94aad ee dastuurka, wuxuu sidoo kalana yeelanayaa:-

1. Ilaalinta amniga iyo nabadgalyada bulshada islamarkaana hagida iyo dabagalka waxqabadka ciidamada booliska tulada.

2. Ilaalinta iyo daryeelka hidaha iyo dhaqanka iyo waxyaabaha kale ee taariikhiga ah.

3. Ilaalinta iyo Dabagalka mashaariicda horumarineed ee tuuulada.

## Qodobka 66aad <u>Magacaabista Guddoomiyaha Tuulada</u>

Sida ku cad qodobka 95 aad ee dastuurka iyaduu sidiisa yahay guddoomiyaha tuulada:

1. Waxaa soo xusha xubnaha golaha ee xisbi ama axsaabta ugu badan kuraasta golaha waxaana ansixiya golaha.

2. Iyadoo mudadiisa shaqo iyo sababaha uu xilka ku waayayo ay la mid tahay xubnaha golaha iyo sida uu dhigayo qodobka......ee bayaanka, ayaa hadana markay timaado in uu is casilo waa in saddex bilood ka hor ogaysiis qoraal ah uu ku wargaliyaa afhayeenka tuulada iyo maamulka degmada.

## Qodobka 67 aad <u>Waajibaadka Gudoomiyaha Tuulada</u>

Awoodaha iyo Waajibaadka Gudoomiyaha maamulka tuuladu iyaduu ahaanayo sida ku xusan qodobka 96 aad ee dastuurka, ayaa sidoo kalana:

1. Wuxuu maamulka tuulada uga qaybgalaa shirarka golaha degmada iyo shirarka kale ee khuseeya, wuxuuna marka ay haboon tahay ka tala bixiyaa magaca tuuladu yeelanayso.

2. Wuxuu dusha ka ilaaliyaa, tilmaamaana ku xigeenka gudoomiyaha iyo xubnaha kale ee gudiga fulinta si ay u gutaan shaqooyinkooda oo ay ku jirto qoondaynta waajibaad waaxeedka xubin kasta uu leeyahay.

3. Wuxuu warbixin ku saabsan hawlaha gudiga fulinta u gudbiyaa goloha iyo dadweynaha tuulada iyo degmada uu hoostago.

4. Wuxuu kor u qaadaa cadcadaanta iyo doodo furan oo ku saabsan fulinta hawlihii loo xilsaaray maamulka tuulada.

5. Wuxuu fuliyaa hawlaha kale ee ay u xilsaaraan golaha ama maamulkla degmada uu hoostago.

## Qodobka 68 aad <u>Waajibaadka Ku Xigeenka Gudoomiyaha Tuulada</u>

Gudoomiye kuxigeenku wuxuu hoostagaa gudoomiyaha:

1. Wuxuu Wakiil ka noqdaa gudoomiyaha marka uu maqan yahay ama uusan awoodi Karin inuu xilkiisa guto.

2. Wuxuu fuliyaa hawlaha gudoomiyuhu iyo goluhu u xilsaaro.

## **Qodobka 69 [aad] <u>Mudada shaqo ee golaha fulinta</u>**

Mudada shaqo ee golaha fulintu waxay la mid tahay mudada shaqo ee golaha xildhibaanada tuulada.

## **Qodobka 70 [aad] <u>Xafiiska Maamulka Tuulada</u>**

1. golaha xildhibaanada tuuladu wuxuu yelaanayaa xafiis u gaar ah.
2. Awoodaha iyo waajibaadka madaxa xafiiska maamulka, sharci ayaa lagu xeerin doonaa.

## ***Qodobka 71 [aad] Maxkamada Bulshada ee Tuulada***

1 Maamulka tuuladu wuxuu aasaasaa maxkamad bulsho.

2 Maxkamadu waxaa weeyi hay'ada garsoorka tuulada waxayna eegtaa arimaha bulshada la xidhiidha.

3 Garsoorayaasha maxkamada bulshadda, waxaa soo xulla oo magacaaba gudoomiyaha tuulada waxaana ansixiya golaha xildhibaanada tuulada.

4 Mudada shaqo ee garsoorayaashu waxay la mid tahay mudada shaqo ee golaha xildhibaanada tuulada.

# QAYBTA 5[AAD]

## Geedi Socodka Shirarka

### Qodobka 72 [aad] <u>Hanaanka Shirarka koowaad ee Tuulada</u>

1 Gudoomiyihii hore u jiray ayaa isugu yeedha shirka koowaad ee golaha tuulada.

2 Afhayeenka, kuxigeenka, gudoomiyaha, iyo xubnaha gudiga fulinta ee cusub waxaa dhaariya garsoore maxkamadeed.

3 Xubnaha golaha ee kale waxaa dhaariya afhayeenka.

4 Nuxurka dhaarta iyo hab-raaceedada waxaa loo isticmaali qodobka 70 (5) ee dastuurka faderaalka oo loo dhigayo si ku haboon xaalada shakhsiyaadka dhaaranaya iyo xilalkooda.

5 Waxaa reeban in uu xubin fuliyo wax ka mid ah waajibaadkiisa ka hor intuusan dhaaran.

### Qodobka 73 [aad] <u>Shirarka Golaha xildhibaanada ee aan Caadiga ahayn</u>

1. Shirarka aan caadi ahayn ayaa qabsoomi Kara marka uu afhayeenku isugu yeedho,
2. ama in ka badan qayb ay xubnaha goluhu qoraal ku soo codsadaan ama gudiga fulintu codsado,
3. waana in uu shirkaasi ku qabsoomaa bil gudaheed oo ka bilaabmaysa
4. marka codsigu gaadho cidii uu khuseeyey.

**Qodobka 74 [aad] Shirarka Golaha xildhibaanada Tuulada**

Shirarka golaha maamulka tuuladu waxay u qabsoomaan sidan hoos ku cad:-

1 Shirarka caadiga ah waxay qabsoomaan bishiiba hal mar.

2 Tirada ugu yar ee shirku ku qabsoomi karo waa 2/3 sadex meelood laba meel ee xubnaha golaha tuulada.

3 Goluhu wuxuu xaqiijiyaa in geedi socodka shirarka taxanaha ah si sax ah loogu qoro dukumantiyada loogu talagalay.

4 Goluhu wuxuu sida uu u arko go'aan uga gaadhi karaa arimaha kale ee ku saabsan shirarka.

**Qodobka 75 [aad] Shirarka Golaha Maamulka Tuulada**

Shirarka golaha maamulka tuuladu waxay u qabsoomayaan sidan soo socota:-

1 Golaha maamulka tuuladu wuxuu si caadi ah u kulmayaa bishii labo jeer.

2 Shirarka waxaa isugu yeedha markuu gudoomiyuhu maqan yahay Ku xigeenkiisa hogaaminaya, ama xubin kale oo loo wakiishay.

**Qodobka 74 aad** **Shirarka Golaha xildhibaanada Tuulada**

Shirarka golaha maamulka tuuladu waxay u qabsoomaan sidan hoos ku cad:-

1 Shirarka caadiga ah waxay qabsoomaan bishiiba hal mar.

2 Tirada ugu yar ee shirku ku qabsoomi karo waa 2/3 sadex meelood laba meel ee xubnaha golaha tuulada.

3 Goluhu wuxuu xaqiijiyaa in geedi socodka shirarka taxanaha ah si sax ah loogu qoro dukumantiyada loogu talagalay.

4 Goluhu wuxuu sida uu u arko go'aan uga gaadhi karaa arimaha kale ee ku saabsan shirarka.

**Qodobka 75 aad** **Shirarka Golaha Maamulka Tuulada**

Shirarka golaha maamulka tuuladu waxay u qabsoomayaan sidan soo socota:-

1 Golaha maamulka tuuladu wuxuu si caadi ah u kulmayaa bishii labo jeer.

2 Shirarka waxaa isugu yeedha markuu gudoomiyuhu maqan yahay Ku xigeenkiisa hogaaminaya, ama xubin kale oo loo wakiishay.

3 Tirade ugu yar ee uu shirku ku qabsoomi karo waa 2/3 (saddex meelood labo meel) ee xubnaha golaha maamulka.

4 Qoraalka doodaha iyo go, aanada golaha waa in godoomiyuhu hubiyo.

5 Qodob hoosaadyada kale ee golaha waxaa go'aamiya golaha.

### Qodobka 76 aad Go'aanada

1 Go'aanada golaha tuulada hadaan bayaankani si kale u dhigin waxay meelmar ku noqonayaan cod hal dheeri ah. Hase yeeshee marka ay codadku is le'ekaadaan waxaa la raacayaa dhanka shir gudoonku raaco.

2 Dhamaan xubnaha golayaasha maamulka waxay wada jir iyo kalajirba xil uga saran yahay dhamaan go'aanada ay gaadhaan iyo ficilada ay sameeyaan.

# QAYBTA 6AAD

## Awoodha Iyo Waajibaadka Degmooyinka Iyo Tuulooyinka

### Qodobka 77aad Awoodaha Maamulada Degmooyinka

Iyadoo la ilaalinayo dastuurka, maamulada degmooyinku waxay goobaha ay ka hawl galaan ka fulinayaan awoodna u leeyihiin arrimahan soo socda:-

1. Waxay fuliyaan awoodaha sharci dajinta, fulinta iyo garsoorka'

2. Waxay ilaaliyaan dastuurka iyo sharciyada kale ee deegaanka, waxayna kor u qaadaan Nabad galyada, Amniga iyo nidaamka dimuqraadiyadeed.

3. Waxay fuliyaan siyaasadaha, sharciyada, xeerarka iyo awaamiirta ay soo saaraan hay'adaha dawlada fedaraalka iyo deegaankaba.

4. Waxay soo saaraan sharciyada, xeer-hoosaadyada, xeerarka, awaamiirta iyo habraacyaha shaqada gudaha, waxaa kale oo ay qabtaan shaqooyinka lagu qeexay bayaanka lagu aasaasay xafiisyada waaxyaha ee dawlad deegaan hoosaadka, dasruurka iyo bayaankaba.

5. Waxay maamulaan oo ay ilaalyaan dhulka iyo khayraadka kale ee dabiiciga ah sidii ay gacan uga gaysanlahaayeen horumar joogta ah oo waafaqsan bayaanka maamulka dhulka ee deegaanka.

6. Waxay fududeeyaan oo korna u qaadaan horumarinta joogtada ah ee deegaan hoosaadka iyagoo diyaarinaya qorshe sanadeed isdaba joog ah oo tabo iyo xeelado wanaagsan leh.

7. Waxay bixiyaan adeegyo la taaban karo oo qiimihiisu u dhigmo tayadiisa iyo waxtarkiisaba, kaas oo ka turjumaya baahida dadka iyo khayraadka aan haysano, iyagoo raacaya awoodaha iyo shaqooyinka lagu cadeeyey bayaanka aasaasida xafiis-waaxeedyada dawlada

deegaanka hoosaadka, dastuurka iyo qodobada bayaankan.

8. Waxay awood u leeyihiin arimaha miisaaniyada iyo maamulida cududa shaqaalaha si waafaqsan qodobada ku haboon ee bayaankan.

9. Waxay u dhaadhiciyaan ama kale soo noqdaan maamulka tuulada (ama heerarka maamul ee kale marka durrufo gaar ahi ay jiraan) shaqooyinka iyo adeegyada iyaga la siiyay markay sidaasi go'aansaadaan, Arintani waxay suurta gal tahay marka:

   b) Labada dhinacba ay heshiis ku yihiin.

   t) Hantida iyo qalabka loo baahan yahay la diyaariyo si loo guto shaqooyinka.

   j) Awoodaha, adeegyada iyo waajibaadka la dhaadhicyey islamarkaana ay diyaar yihiin habraacyo haboon oo lagu kor meeri karo hawlahaas.

   x) Talaabooyinka loo qaaday dhanka wax qabadka la doonayo ee ay sababayso dhaa - dhicintu waa in ay gaadhaan kana tarjumayaan dareenka dadka.

## Qodobka 78aad Awooda iyo Shaqooyinka Tuulada

Iyadoon laga gudbaynin xuduudaha Dastuurka Dawlada Deegaanka Soomaalidu dhigayo, ayaa waxay maamulka tuulooyinku goobaha hoos yimaada ka fulinayaan shaqooyinka hoos ku xusan:-

1. Waxay ilaaliyaan Dastuurka iyo qawaaniinta kale ee ay soo saaraan laamaha sare, waxayna kor u qaadaan nabad galyada iyo maamulka dimuqraadiga ah.

2. Waxay fuliyaan tilmaamaha iyo qorshayaasha ka soo baxa maamulka degmada.

3. Iyagoo raacaya sharciyada degmooyinka iyo deegaanka waxay soo saaraan oo fulintoodana xaqiijiyaan tilmaamo shaqo oo ku haboon tuulada.

4. Iyagoo ka duulaya qorshayaasha iyo tilmaamaha ka soo baxa ha'yada sare, ayay waxay diyaariyaan oo ay fuliyaan korna meeraan waxqabadka qorshayaasha horumarinta, iyadoo laga qayb galinayo dadweynaha, ururada bulshada, wakiillada horumarinta iyo wakiilada kale ee ay khusayso.

5. Waxay ka qayb qaataan diyaarinta qorshaha isticmaalka dhulka, iyadoo dhanka farsamadana ka kaashanaya deegaanka iyo degmadaba si loo dar dar galiyo horumarka dhinacyada ilaalinta iyo daryeelka deegaanka.

6. Waxay si wax ku ool ah u fuliyaan shaqooyinka degmadu u dhaadhicisay una wakiilatay sida uu xusayo qodobka 80(9) ee bayaankan.

7. Waxay fududeeyaan inay dadka tuulada ka qayb qaataan horumarka tuulada iyo sidii loo dhowri lahaa khayraadka dabiiciga ah.

## Qodobka 79aad Awoodaha qorshaynta

Waxay awood qorshaynayd u leeyiihiin arrimahan hoos ku xusan:-

1. Kor u qaadista qorshaha horumarinta goobaha hoosyimada dagmada iyo tuulada.

2. Diyaarinta qorsha horumarineedyada la xidhiidha degmooyinka iyo tuulooyinka.

3. Diyaarinta qorshayaal horumarineed oo sanadle ah (year action plan).

4. Kormeerida fulinta qorshayaasha iyo mashaariicaha horumarinta ee heer degmo iyo tuulo.

5. Fulinta wixii kale ee qorsho horumarineed ah ee bayaanka ama xeer kale siiyey.

## Qodobka 80aad Qorshayaasha horumarineed ee xiliga dheer iyo dhexe

Si loo hirgaliyo awoodaha lagu siiyay qodobada 78aad iyo 79aad ee bayaankan, Maamulada degmooyinku waxay:-

1. Diyaariyaan oo ay ansixiyaan qorshayaasha shanta sano ee horumarineed oo ku salaysan daraasaad laga sameeyay xaaladaha arimaha bulshada, dhaqaalaha deegaanka, dhaqanka, tirada dhalashada iyo dhimashada, cudurada, baahiyaha iyo dhiibaatooyinka kala duwan ee jira.

2. Marka qorshaha la samaynayo waa in la tixgaliyaa:-

   b) Qorshayaasha maamulada sare lagu diyaariyay sida Kan heer deegaan.

   t) Siyaasadaha iyo qoraalada xafiiska maaliyada iyo horumarinta dhaqaalaha iyo xafiisyada kale ee la xidhiidha.

   j) Qorshayaasha lagu diyaariyay maamul hoosaadyada sida tuulooyinka iyo Degmooyinka.

   x) Dhamaan siyaasadaha iyo qorshayaasha kala duwan ee ku haboon Lana xidhiidha dhaadhicinta awoodaha.

3. Qorshaha la diyaarinayo wuxuu ka koobnaanayaa:-

   b) Ujeedooyinka guud ee qorshaha joogtaynta horumarka.

   t) Siyaasado iyo barnaamijyo isdaba joog ah oo loogu tala galay in lagu gaadho ujeedooyinka guud si loo daboolo arimihii lagu soo ogaaday daraasaada iyo qiimqyntii la sameeyey.

4. Geedi socodka lagu diyaarinayo qorshayaasha horumarineed waa in ay ka qayb galaan dadwaynuhu sida:

   b) Wakiilada maamulada tuulooyinka.
   t) Gudiyada joogtada ah ee golaha fulinta.
   j) Ururada bulshada eekala duwan.

x) Gudiyada iyo hay'adaha horumarinta ee ay khusayso.

kh) Xafiisyada dawlada iyo ururada aan dawliga ahaynba.

5. Diyaarinta siyaasadaha iyo barnaamijyada waa in la tixgaliyo:-

b) Horumar kor u qaadaya cadaalada una faaiidaynaya dadka iyo tuulooyinka dib u dhacay, dhaqaalaha iyo waxyaabaha loo baahanayahay ee dhinaca Kaaba yaasha dhaqaalaha.

t) Waxyaabaha daruuriga ah ee dhaqaalaha iyo kaabayaasha la xidhiidha.

j) Tashiilida khayraadka deegaanka, iyo hawlgal kor u qaadaya wax soo saarka oo faaiido u leh marka loo eego kharashka ku baxay.

x) Horumar shaqo oo u abuuraya bulshada inteeda aan wax baran iyo kuwa aqoonta leh ee degmada gaar ahaan haweenka, dhalinyarada iyo dadka naafada ah.

kh) Waxqabad kobcinaya awooda bulshada oo ay dadwaynuhuna ka qayb qataan.

d) Waxqabad horumarineed oo deg-deg ah, iyo cashiro anshax wanaaga iyo wacyigalineed oo lagu dhiso bulshada.

6. Nuqulka hore ee qorshaha waa in loo soo bandhigo dadweynaha si ay uga doodaan ugana talo bixiyaan si dib loogu habeeyo hadii loo baahdo.

7. Gudiga fulinta ee maamulada degmooyinka, ayaa ka doodi oo fulin nuqulka hore ee qorshaha

kadibna waxaa lagu samayn talo bixintii dadwaynaha iyo dib u habayntii la xidhiidhay.

8. Golaha degmada ayaa ka dooda oo ansixin ka dib marka gudiga fulinta u soo gudbiyo iyagoo waliba wax ka badali Kara haday lagama maar maan u arkaan.

9. Qorshaha waa in si joogta ah loo kormeero loona qiimeeyo taas oo ay ku jirto geedi socodka dib u eegista waxqabadkii sanadka iyadoo ay ka qayb galayaan dhamaan dadka iyo hay'adaha ay khuseyso.

**Qodobka 81 aad** **Diyaarinta Qorsha Sanadeedka**

1. Maamulada degmooyinka waa in ay diyaarsadaan qorshe sanadeed taasoo hindisihiisa lagu darayo miisaaniyada sanadka marka la diyaarinayo ay tahay:-

   b) In lagu xisaabtamo qorshaha guud ee ay samaysay iyo Kan ay diyaariyeen maamulada sare ee saamaynta ku leh.

   t) In lagu xisaabtamo siyaasadaha iyo qoraalada rasmiga ah ee xafiiska maaliyada iyo xafiisyada kale ee ku lug leh.

   j) In lagu xisaabtamo qorshayaasha tuulooyinka iyo magaalooyinka hoos yimaada.

   x) In la tixgaliyo dhamaan qorshayasha iyo siyaasadaha haboon ee la xidhiidha horumarinta goobta.

2. Golaha fulinta ee degmadu waa inay xaqiijiyaan in hindisaha qorshuhu uusan ka balaadhnayn khayraadka ay haysato dowladu, si arintan loo suurta galiyana waa in la sii qiyaaso khayraadka laysku halayn karo sanadka soo socda iyadoo lagu xisaabtamayo:

b) Cududa shaqaale, dakhliga iyo hantida kale

t) Deeqaha ama kabista laga heli karo dawlada deegaanka.

j) Taageerada dhaqaale, maadi ama khibradeed ee laga heli karo xafiisyada ay khuseyso ee dawlada deegaanka .

x) Deeqaha hay'adaha dawliga ah iyo kuwa aan dawliga ahaynba.

3. Geedi socodka lagu diyaarinayo qorshe sanadeedka waa in uu yahay mid bulshada iyo cidii ay khusaysaba ka qaybgalaan gaar ahaan:

b) Marka qorshuhu la xidhiidho goobo cayiman, waa in tuulada lagala tashado hindisaha qorshaha.

t) Marka qorshaha uu yahay adeegyo bulsho oo cusub waa in kulamo iyo fagaarayaal wada tashi la qabtaa.

4. Nuqulka hore ee qorshaha waa in dadka loo bandhigo oo dibna loo habeeyo markay ka tala bixiyaan.

5. Gudiga fulintu waa inay marka loo soo gudbiyo nuqulka koobaad ay ka doodaan ansixiyaana

2. Golaha fulinta ee degmadu waa inay xaqiijiyaan in hindisaha qorshuhu uusan ka balaadhnayn khayraadka ay haysato dowladu, si arintan loo suurta galiyana waa in la sii qiyaaso khayraadka laysku halayn karo sanadka soo socda iyadoo lagu xisaabtamayo:

b) Cududa shaqaale, dakhliga iyo hantida kale

t) Deeqaha ama kabista laga heli karo dawlada deegaanka.

j) Taageerada dhaqaale, maadi ama khibradeed ee laga heli karo xafiisyada ay khuseyso ee dawlada deegaanka .

x) Deeqaha hay'adaha dawliga ah iyo kuwa aan dawliga ahaynba.

3. Geedi socodka lagu diyaarinayo qorshe sanadeedka waa in uu yahay mid bulshada iyo cidii ay khusaysaba ka qaybgalaan gaar ahaan:

b) Marka qorshuhu la xidhiidho goobo cayiman, waa in tuulada lagala tashado hindisaha qorshaha.

t) Marka qorshaha uu yahay adeegyo bulsho oo cusub waa in kulamo iyo fagaarayaal wada tashi la qabtaa.

4. Nuqulka hore ee qorshaha waa in dadka loo bandhigo oo dibna loo habeeyo markay ka tala bixiyaan.

5. Gudiga fulintu waa inay marka loo soo gudbiyo nuqulka koobaad ay ka doodaan ansixiyaana

iyagoo awoodna u leh inay dib u habayn ku talo bixiyaan.

6. Nuqulka koowaad waa in loo gudbiyaa gudiyada golaha ee joogtada ah ee ay khusayso si ay uga baaraan dagaan ka hor intaan goluhu ansixinin.
7. Qorsha sanadeedka degmada waa in si joogto ah loo kormeero, sanadkastana dib loo eego iyadoo ay ka qayb qaadanayaan arintaa maamulāda tuulooyinka, ururada bulshada iyo gudiyada horumarintu.

## Qodobka 82 aad Fulinta Mashariicda iyo Barnaamijta

1. Golaha fulinta degmadu waxay xaqiijiyaan diyaarinta qorshayaasha mashaariicda iyo barnaamijada taasoo laga soo xiganayo qorshe sanadeedka.
2. Dhamaan hindisayaasha mashaariicda waa in la darsaa meel marintooda iyadoo laga eegayo kharashka iyo faaiidada guud oo ay kamid tahay:

   b) Inta ay soo saari karto dakhli ee ay abuuri karto fursado shaqo.
   t) Inta ay saamayn ku yeelan karto kor u qaadka horumarinta dhaqaalaha iyo beeraha.
   j) Inta ay kor u qaadi karto kobcinta awooda, iyo isticmaalka farsmada iyo khibrada iyo khayraadka.
   x) Waxtarka dhinaca deegaanka.
   kh) Waxtarka dhinaca arimaha bulshada oo ay ka mid tahay inta ay taageeri karto nolosha haweenka iyo caruurta.
   d) Faaiidoooyinka dhinaca joogtaynta horumarinta.

3. Fulinta iyo maaraynta mashaariicdu waa inay noqdaan: -

   b) Mid dadwaynuhu ka qayb qaataan.

   t) Mid dadwaynaha ka faaiidaysanaya u baaqaysa.

   j) Mid hubaal ka dhigaysa hab raacyo wada shaqayn ee waaxyaha, hay'adaha dawlada, kuwa aan dawliga ahayn, bulshada qaybaheeda kale duwan iyo saaxiibada horumarinta oo dhan.

4. Mashaariicda cidkasta oo fulinaysa waa inay raacdaa hab raacyada kormeerka iyo qiimaynta ee ay soo saaraan golaha fulinta iyagoo kaashanaya qaybaha kale ee ay khusayso.

5. Mashaariicda kaabayaasha dhaqaalaha la xidhiidha waa in ay ka mid noqdaan qorshayaasha dayactirka iyadoo la raacayo cabbirka ay samaynayaan gudiga fulinta ee degmadu.

## Qodobka •83 •aad Gudiga Farsamo ee Qorshaynta Iyo Dabagalka

1. Gudiga dabagalka iyo qorshaynta oo ka kooban shaqaale ku haboon ayaa laga aasaasi waaxda xafiiska maaliyada iyo horumarinta dhaqaalaha ee degmada.

2. Gudiga dabegalka iyo qorshaynta waxay yeelanayaan shaqooyinka soo socda:

b) Waxay talo iyo taageero ka bixinayaan arimaha qorshaynta.

t) Waxay isku xidhayaan geedi socodka diyaarinta qorshaha shanta sano.

j) Waxay diyaariyaan nuqulka koowaad ee dukumintiga qorshe sanadeedka iyo maaraynta geedi socodka wada tashiga.

x) Maaraynta geedi socodka kormeerka iyo dib u eegista.

kh) Aasaasida hanaan xogta loo qorsheeyo iyo kormeerka taaba galinta hawlihii la qorsheeyay.

3. Gudiga fulintu waxay fasixi karaan in la isticmaalo adeega la talinta si loo taageero shaqada kooxda dabagalka iyo qorshaynta iyo shaqaalaha la heli karo.

## Qodobka 84 aad Adeeg Bixinta

Maamulada degmooyinku waxay mas'uuliyadi ka saarantahay in ay bixiyaan adeegyadan hoos ku cad:-

1. Maamulada degmooyinku waxay fulinayaa hawlaha loo xilsaaray ee uu qeexayo bayaanka lagu aasaasay xafiis waaxeedyada iyadoon laga gudbayn bayaankan iyo sharciyada kalaba.

2. Marka ay jirto adeeg bixin ay wadaagaan laamaha kala duwan ee dawladeed, degmooyinka ay khusayso ayaa abuuri Kara

hanaan wax is ku xidha oo suurtagaliya in adeegyadu u qabsoomaan si midaysan oo wada jir ah oo waliba waafaqsan qorshayaasha horumarinta ee ay ansixiyaan.

3. Iyadoo la raacayo qodobada 78aad iyo 79aad ee bayaankan, degmooyinku waxay u wakiilan karaan qaar ka mid ah shaqada adeeg bixinta laamaha sare ama tuulooyinka hoos taga.

## Qodobka 85aad Maamulida Khayraadka Dabiiciga ah iyo Dhulka

Maamulada dagmooyinka ayaa masuul ka ah maaraynta khayraadka dabiiciga ah sida hoos ku xusan:

1. Dawlada ayaa hawshan ka taageeraysa degmooyinka sharcina u dajin sidii loo hirgalin lahaa bayaanka maamulka iyo isticmaalka dhulka ee deegaanka.

2. Maamulada dagmooyinku waxay ilaaliyaan oo ay daryeelaan khayraadka dabiiciga ah ee goobaha hoosyimaada iyagoo isticmaalaya:

   b) Tabo iyo siyaasado haboon ee qorshaha xiliga dheer iyo Kan sanadlahaba ah iyagoo raacaya siyaasadaha hay'adda ilaalinta deegaanka iyo isticmaalka dhulka.
   t) Soo saarista xeer-hoosaadyo ka hortagaya isticmaal aan xadaysnayn ee khayraadka dabiiciga ah iyo ficilada abuuraya

wasakhawga hawada, biyaha, carada iyo goobaha dadku dagaan.

3. Maamulka degmadu wuxuu diyaariyaa oo joogteeyaa diiwaanka deganaanshaha dhulka, oo waxay u soo saaraan shahaadooyinka gacan ku haynta dhulka iyo guud ahaan maaraynta dhulka miyiga iyo magaalada iyagoo la tashanaya oo kaashanaya maamulka tuulooyinka iyo magaalooyinka.

4. Maamulka degmadu waxay korka kala soconayaan iskuna xidhayaan tuulooyinka sidii ay u diyaarsan lahaaayeen qorshaha isticmaalka dhulka taasoo ay ka mid tahay:

b) Kor u qaadista isticmaalka dhulka ee ugu wax soo saarka badan taasoon wax u dhimayn wada noolaanshaha dabiiciga ah ee dadka iyo deegaankaba, ilaalinta carada iyo khayraadka kale ee dabiiciga ah.

t) Ka qayb galinta dadwaynaha dhamaan heerarka geedi socodka qorshaynta iyo

j) Ka qayb galinta iyo isticmaalka taageerada farsamo ee mas'uulada fidinta beeraha

## Qodobka 86aad <u>Awooda soo saarida Xeer Nidaameed</u>

Maamulada degmooyinku waxay awood u leeyihiin samaynta xeer-hoosaadyo ay ku maamulayaan

shaqooyinka la siiyay ee ay ka fulinayaan goobaha hoos yimaada waana sidan soo socota:

1. Waxay xeer-hoosaadyo u soo saari karaan guud ahaan golaha ama qayb ka mid ah iyagoo raacaya dastuurada federaalka iyo deegaanka iyo sharciyada guud ee ka soo baxa maamulada sare.

2. Waxay soo saari karaan xeer-hoosaadyo ay ku fasaxayaan, kuna diidayaan, kuna hakinayaan ama ay ku baabi'inayaan shatiyo ama ogolaansho uu qof wax ku aasaasayo, guryo ku yeelanayo ama uu hawl kale ku qabanayo.

3. Golaha fulinta waa inuu tixgaliyaa fikradaha iyo aragtida gudiyada joogtada ah ee ay khusayso iyo dhinacyada kale ee danaynaya intaan la guda galin hindisaha xeer hoosaad lagu soo saarayo.

4. Soo saarista xeer-hoosaadyada waxaa fasixi Kara golaha, kadib markuu helo oo uu ka doodo tala bixinta gudiga fulinta.

5. Nuqulka koowaad ee xeer-hoosaadka waa in loo gudbiyo xafiiska xeer ilaalinta iyo cadaalada ee degmada si ay u hubiyaan in uu waafaqsan yahay dastuurka iyo sharciyada kale, Nuqulka rasmiga ah waxaa loo gudbiyaa golaha si uu u ansixiyo.

6. Marka uu goluhu ogolaado in xeer-hoosaad la soo saaro, golaha wuxuu u xil saaran yahay:

   b) In nuqul hindisaha xeer-hoosaadka la dhigo xafiiska golaha ama meesha kale ee lagu shaaciyo ama lagu bandhigo ogaysiisyada golaha, halkaas oo mudo afar iyo toban cisho ah la dhigayo si qofkastaa uu uga baaraandago.

t) In la soo dhaweeyo dadka ka soo horjeeda xeer-hoosaadka iyagoo fikradahooda ku soo gudbinaya qoraal ama soo marinaya xildhibaanadooda mudo afar iyo toban cisho ah oo ka bilaabmaysa dhamaadka mudada lagu xusay qodobkan faqradiisa 6aad xarafkiisa (b).

7. Marka diidada xeer-hoosaadka loo gudbiyo si waafaqsan qodobkan faqradiisa 6aad, goluhu wuxuu dib u eegaa arinta markaas kadibna uu ansixiyo asalka xeerhoosaadka ama uu ogolaado in wax laga badalo sida ay dadku dalbabanayaan ama gabi ahaanba inuu diido xeerhoosaadka.

8. Marka xafiiska xeer ilaalinta guud iyo cadaaladu uu u arko in xeerhoosaadku uu Garab marsan yahay dastuurka ama sharci kale, hindisaha waxaa dib looga celiyaa maamulkii degmo si ay dib ugu soo habeeyaan ama go'aan kale uga qaataan mudo sagaashan cisho gudahood ah.

9. Marka xeer-hoosaadka la'ansixiyo oo uu goluhu soo saarayo waa in uu saxiixa guddoomiyaha degmadu.

## Qodobka 87[aad] <u>Dhulka iyo Hantida kale ee la xidhiidha</u>

Maamulada degmooyinku iyo tuulooyinku waxay awoodaha hoos ku xusan u leeyihiin dhulka iyo hantida laxidhiidha: -

1. iyagoo u hogaansamaya dastuurka iyo sharciyada kale, waxay maamulada degmooyinku iyo tuulooyinkuba la wareegi karaan dhulka ama xuquuq la xidhiidha dhulka oo ay weheliso ama aanay wehelininba dhismayaal ,iyagoo ujeedaduna tahay in la hirgaliyo shaqo ama

hawl uu fasaxayo bayaankani, marka la wareega ay ogolaadaaan gudiga fulinta deegaanka ee la wareeguna yahay mid xilkasnimo ay ku dheehantahay oo lagamamaarmaan ah ,marka loo eego caafimaadka dadwaynaha ama qorshaynta iyo horumarinta deegaan-hooseedka .

2. Magdhaw cadaalad ah waa in la siiyaa dadka lagala- wareegay dhulka iyadoo la eegayo horumarinta uu dhulka ku sameeyay Faahfaahintana waxaa lagu soo saari doonaa xeer-xukuumadadeed.

3. Iyagoo la tashanaya hay'adaha ay khusayso ayay degmadu ama tuuladu dib u dajinaysaa dadka ku Bara kacay balaadhinta magaalooyinka, waxayna magdhow cadaalad ah ka bixisaa wixii hanti ku luntay geedi socodka la wareegista .

## Qodobka 88[aad] Iibsiga Alaabta iyo Adeega

1. Golaha xildhibaanadu wuxuu aasaasayaa hab raacyo iyo sharciyo qeexan oo lagu maamulo iibsiga alaabta iyo adeegyada loo baahan yahay, si dawladu u sheqayso iyadoo la raacayo shuruudaha uu dhigayo sharciga iyo xeerka iibka ee deegaanku.

2. Si loo fuliyo iib hufan hab raacyada waa in ay xaqiijiyaan:

b) Cadaalad, cadcadaan iyo islaxisaabtan.

t) In heerar maamul oo kala duwan ay ansixiyaan iibka.

j) In go'aanada dawlada ee arimaha tartanka ay noqdaan kuwa furan oo la bandhigo.

# QAYBTA 7AAD

## Qodobada Maaliyada

### Qodobka 89aad <u>Qodobada Aasaasiga ah ee Miisaaniyada Degmooyinka</u>

Maalgalinta miisaaniyadeed ee maamulada degmooyinku waxay ku shaqeeyaan oo ay raacaan qodobada soo socda:-

1. Miisaaniyada maamulada degmooyinka iyo tuulooyinkuba waxay ka kobnaanaysaa dakhliga ay iyagu soo saaraan iyo miisaaniyad ay dawlada deegaanku u qoondeyso.

2. Maamulada Degmooyinka waa in loo suurtagaliyaa in ay in badan oo dakhligooda ah ka soo saaraan ilahooda gaarka ah, si ay u abuurnaato, xidhiidh is la xisaabtan oo wax ku ool ah oo dhex mara iyaga iyo dadka soo doortay.

3. Waxa ka soo hadha dakhligooda waa in lagu bixiyo ujeedooyin isugu jira kuwa guud iyo kuwo gaarka ah ee miisaaniyada deegaanka u wareejinayso.

4. Dakhliga loo qoondaynayo maamulada iyo tuulooyinka waa inaan waxba lagu xidhin, si ay ugu suurtagasho in ay ka baaraan dagaan mudnaanta ay kala leeyihiin waaxyuhu, iyo mudnaanta ay kala yeelanayaan miisaaniyada mashaaricda, iyo tan soo noqnoqota ee caadiga ah.

5. Dawlada deegaanku waxay ku salayn kartaa habka qoondaynta miisaaniyada, hadba inta ay la egtahay hirgalinta mashaariicda iyo waxqabadka qorshaha.

6. Degmooyinka ma uruurin karaan canshuur ama lacagaha adeeg bixinta, haddaan lagu cadeynin bayaankan iyo sharciyada canshuuraha ee federaalka iyo deegaankaba

Ururinta iyo isticmaalka canshuuraha loo fasaxay degmooyinka waxay u suurtagalisaa.-

b) Gudashada waajibaadka sharcigu saaray.

t) Helida fursad ay ku horumariyaan goobaha hoosyimaada si hal abuur iyo ka go'naani ku dheehantahay.

j) Ku guulaysiga maamul wax ku ool ah ee dhinaca miisaaniyada.

7. Dadweynaha waa in loo soo bandhigo xogta ku saabsan isticmaalka lacagaha ee xiliga tagay, Kan jooga iyo Kan soo socda ee la qorsheeyay ee dawlad deegaan hoosaadka.

## Qodka 90aad Doorka Dawlada Deegaanka

Iyadoon la dhawrayo shuruucda la xidhiidha arrimaha maliyadeed, wuxuu xafiiska maaliyada iyo horumarinta dhaqaaluhu kormeeraa oo maamulaa miisaaniyada, Wuxuuna fuliyaa waajibaadyadan soo socda:

1. Isagoo la tashanaya xafiiska loo xilsaaray degmada wuxuu soo saaraa foormaadyo, jadwal iyo habraacyo ay raacayaan degmadu markay diyaarinayaan miisaaniyad sanadeedka.
2. Isagoo la tashanaya xafiisyada ay khusayso wuxuu diyaariyaa qaacido lagu go'aaminayo inta degmadu ay ka heli karto miisaaaniyada kabista sanad kasta.
3. Todobaadka ugu dambeeya ee bisha sanne waa inuu ku wargaliyaa degmada qoondada ay ka heleen miisaaniyada kabista ee isugu jirta deeq ujeedo guud leh iyo mid ujeedo gaar ah leh.
4. Wuxuu kormeeraa, dabagalaa oo qiimeeyaa fulinta miisaaniyada degmada.
5. Wuxuu u gudbiyaa xeerarka iyo tilmaamaha la xidhiidha miisaaniyada iyo xisaabaadka.

## Qodobka 91aad Aasaasida Gudiga Latalinta

1. Dawlada deegaanku waxay aasaasi kartaa Gudiga Latalinta Miisaaniyada oo ka tala bixiya arimaha miisaaniyada ee maamulada degmooyinka iyo tuulooyinka .Gudigu wuxuu ka koobnaanayaa wakiilo is le'eg oo ka kala

imanaya dawlada deegaanka iyo maamulada degmooyinka iyo tuulooyinka kuwaas oo aan ka badnayn sagaal xubnood.

2. Gudiga waxaa magacaabaya gudiga fulinta deegaanka mudo Shan sano iyadoo la raacayo hab-raacyo ay soo saarayso dawlada deegaanku.

**Qodobka 92aad Waajibaadka Guddiga Latalinta Miisaaniyada Ee Deegaanka**

Guddigu wuxuu xil ka saaran yahay fulinta waajibaaddan soo socda:

1. Wuxuu dawlada deegaanka kala taliyaa qaacidooyinka loo isticmaalayo qoondaynta deeqaha la siiyo maamulada degmooyinka iyo tuulooyinka ee ujeedooyinka guud iyo kuwa gaarka ahba leh.

2. Wuxuu dawlada deegaanka kala taliyaa qaabaynta iyo fulinta wareejinta miisaaniyada ee ku salaysan tayada fulinta ee ay dawladu soo bandhigi karto.

3. Wuxuu dawlada deegaanka kala taliyaa dakhliga loo daayey dawlada deegaanka miyiga iyo Kan la wadaago.

4. Wuxuu maamulada degmooyinka iyo tuulooyinka kala taliyaa sanad kasta heerarka haboon ee dakhliga iyaga loo xilsaaray.

5. Wuxuu dawlada deegaanka iyo tan degmooyinka iyo tuulooyinkaba kala taliyaa muranka soo kla dhex gali Kara.

6. Wuxuu fuliyaa hawlihii kale ee dawlada deegaanku u xilsaarto.

**Qodobka 93aad** **Dakhliga maamulada Degmooyinka**

Iyadoo la raacayo shuruucda dawlada deegaanka ee la xidhiidha canshuuraha, maamulada degmooyinka iyo tuulooyinku waxay ururiyaan daakhliga ka soo baxa ilaha hoos ku xusan:-

1. Canshuurta dakhliga shaqaalaha dawlad deegaan-hoosaadka iyo shaqaalaha xafiisyada dawlada ee mushaarka ka qaata miisaaniyada dawlada deegaan-hoosaadka.

2. Canshuurta dakhliga shaqaalaha, shirkadaha, dawlada deegaan-hoosaadka.

3. Canshuurta dakhliga shaqaalaha, shakhsiyaadka iyo shirkadaha deegaanka ee shatiyada ka qaatay dawlada deegaan-hoosaadka.

4. Canshuurta dakhliga isticmaalka dhulka iyo beeraha.

5. Canshuurta kirada guryaha iyo tan guryaha.

6. Canshuurta ganacsiga ee:

b) Liiska ganacsatada ee B iyo C ee lagu xusay sharciga canshuurta dakhliga.

t) Shirkadaha macdanta yar yar.

j) Shirkadaha ay leedahay dawlada deegaan-hoosaadku.

x) Isticmaalka dhulka ee hawlaha aan beeraha ahan.

## Qodobka 94 aad Lacagaha Adeega Iyo Canshuuraha

Maamulada Degmooyinka iyo Tuulooyinku waxay ururiyaan lacagaha adeeg bixinta iyo Canshuuraadka ee hoos ku xusan: -

1. lacagaha adeeg bixinta waxaa laga uruuriyaa; adeegyada bulshada sida jidadka, buundooyinka, waraabka, ceelasha biyaha, xarumaha caafimaadka, deegaanada ay ka midka yihiin hoteeladu, maktabadaha, isbitaalada sida gaarka ah loo leeyahay, dhismayaasha shirarka ee ay leeyihiin maamulada degmooyinka ama tuulooyinku, fasaxyada ogolaanshaha la siiyo shakhsiyaadka iyo hay'adaha horumarinta, diiwaangalinta dhalashada, guurka, furiinka, dhimashada iyo heshiisyada, shatiyada iyo lacagaha kale ee adeeg bixinta.

2. Canshuuraha waxaa laga uruurin: canshuurta macaashul macaashka (turn overtax) ee shirkadaha sida gaarka ah loo leeyahay iyo shirkadaha dawladaha, canshuurta wax soo

saarka gudaha (exice tax) ee shirkada sida gaarka ah loo leeyahay, canshuurta faaiidada la saaro (capital gains tax) iyo canshuuraadka la saaro lacagaha laga helo shaqooyinka ay ka midka yihiin qoraanimada ee loo yaqaano royalities.

## Qodobka 95 aad <u>Dakhliga Laga Helo Iibka</u>

Maamulada degmooyinku waxay dakhli ka uruurin karaan: -

1. Waxyaabaha la iibiyo ee ah: hantida guurtada ah iyo tan ma'guuraanka ah ee dawladda, godadka ama goobaha xaanida iyo dhagaxa laga qaado, carada iyo looxa ama qoryaha, canshuurta faaiidada iyo iibka ee ganacasatada goobtaas degan.

2. Iibinta alaabta khayraadka dabiiciga ka soo jeeda, waa in lajoojiyo marka ay waxyeelaynayso deegaanka.

3. Iibka wax soo saarka khayraadka dabiiciga ah ee goobaha dawladda deegaanku xadiday, waa inaan la ogolaanin hadaanay jirin ogolaansho gaar ah oo uu bixiyay xafiiska ay khusayso.

## Qodobka 96aad <u>Dakhliga Ay Wadaagaan Dawlada Deegaanka Iyo Degmooyinku</u>

Dakhliyadan hoos ku xusan ee ay soo saarto degmadu waxaa la wadaagi dawlada deegaanka:

1. Canshuurta dakhliga (income) beeraha ee ka soo baxda dhul la kireeyay oo loo isticmaalay maalgashi dhinaca beeraha ah.

2. Royalties laga helo macdanta marka laga reebo macdanta yaryar sida dhagaxa la qodo, kiimikada bacrimiyaha ah ee loo yaqaano potash, fooxa iyo wax soosaarka khayraadka dabiiciga ah.

3. Lacagaha dalxiiska ee laga helo goobaha dalxiiska ee degmooyinka.

## Qodobka 97[aad] Shaacinta Dakhliga La wadaago

Heerarka dakhliga deegaanka iyo xadiga dakhliga la wadaago dawlada deegaanka ayaa sharci ka soo saari kadibna baahin.

## Qodobka 98[aad] Lacag Wareejinta/qoondayn

Maamulada degmooyinku waxay xaq u leeyihiin in ay dawlada deegaanku u wareejiso/ u qoondayso miisaaniyada sida soo socota:

1. Wareejinta ujeedo guud leh oo aan shuruudi ku xidhayn oo loogu talo galay kharashka hawl fulinta ee guud iyo hawlaha kale ee ay go'aamiso degmadu.

2. Wareejin ujeedadeedu xadidan tahay oo ay shuruudi ku xidhan tahay oo loogu talo galay ujeedooyin ay qeexayso dawlada deegaanku.

3. Dawlada deegaanku waxay siin kartaa degmooyinka iyo tuulooyinka deeqo kala duwan oo xili iyo shuruud leh sida deeqda isku dheelitirka, deeqaha saamiga ah iyo deeqaha shaqo qabsoomay.

## Qodobka 99aad Deyn Qaadashada Degmooyinka

Waxaa reeban in ay degmooyinka iyo tuulooyinku lacag ka daynsadaan xafiis ama shakhsi, ama in ay damaanato dayn ay cid kale qaadatay ,haddaan si cad dawlada deegaanka ugu fasixin habraaca, codsiga iyo ogolaanshaha dayn qaadashada waxaa go'aamiya/qeexa xafiiska maaliyada iyo horumarinta dhaqaalaha oo cuskanaya xeer-xukuumadeed.

## Qodobka 100aad Sanduuqa Degmooyinka

Degmo kasta waa in ay yeelataa hal sanduuq, iyada oo ay ujeedadu tahay maaraynta dakhliga iyo kharashka, Dawlada deegaanku waxay soo saartaa xeer ku saabsan miisaaniyada iyo xisaabaadka, oo qeexaya talaabooyinka dhinaca miisaaniyada iyo Isla xisaabtanka ee ay tahay in ay degmooyinku raacaan. Intaas waxaa dheer talaabooyinka laga maaraynayo sanduuqa ee soo socda:

1. Sanduuqa lacagta waa in la dhigaa bangiga.
2. Dhammaan dakhliga ay ururiso degmadu waa in la dhigaa sanduuqa.
3. Xafiiska maaliyada iyo horumarinta dhaqaalaha degmada ayaa maamulaya sanduuqa.

4. Wax lacag ah lagama saari karo sanduuqa haddaan golaha degmadu horay u ansixinin markii la diyaarinayay miisaaniyada sanadka.

5. Warbixinta isticmaalka lacagta sanduuqa waa in ugu yaraan saddexdii biloodba hal mar uu diyaariyo xafiiska maaliyada iyo horumarinta dhaqaalahu una gudbiyaa gudiga fulinta, gudida joogtada ah iyo xafiiska maaliyada ee deegaanka.

6. Sanduuqu wuxuu yeelanayaa tirada ugu yar ee xisaabaadka (accounts) dakhliga iyo kharashka ee uu qeexayo xafiiska maaliyada ee deegaanka.

7. Degmooyinku waxay yeelan karaan xisaabaad kale oo dheeri ah.

## **Qodobka 101 [aad] <u>Miisaaniyada Degmooyinka</u>**

Maamulada degmooyinku waa in ay diyaariyaan, ansixiyaan oo meelmariyaan miisaaniyadooda iyagoo raacaya shuruudaha soo socda:-

1. Miisaaniyad waa inay isuku dheeli tirnaato (laysu miisaamo).

2. Miisaaniyada waa in loo isticmaalo qaababka uu tilmaamo xafiiska maaliyada ee deegaanku.

3. Meelaha ay mudnaanta siiyaan dawlada federaalka iyo tan deegaanku waa in la siiyaa tixgalin miisaaniyadeed.

4. Miisaaniyadu waa in ay ka turjumaysaa dakhliga la uruurin doono oo sanadkastana wax loo qoondeeyo.

5. Miisaaniyada waa in uu ka mid noqdaa (ku jiraa) qiyaasta qorsha sanadeedka horumarinta, waana in miisaaniyada lala socodsiiyo barnaamijka guud ee kharashka degmada.

6. Inta uusan goluhu ansixinin miisaaniyada waa in la shaaciyo (la ogaysiiyo dadka) lagalana tashadaa dadwaynaha goobtaas degan.

7. Waxaa reeban in waajibaad shaqo oo cusub loo isticmaalo ( la saaro) miisaaniyada kadib markii la ansixiyay ee la kala qoondeeyay haddaanay jirin:-

    b) Lacagayaw/ sanaaduuq dheeri ah oo si cad loogu tala galay inay daboolaan waajibaadkaas/ baahidaas cusub.

    t) Arin lama filaan ah oo wax ka qabadkeedana uu waajib yahay.

8. Kadib marka miisaaniyada la ansixiyo, koodh miisaaniyadeedyada waxaa lagu wareejin karaa koodh miisaaniyadeed kale si waafaqsan sharciyada maaliyada ee uu soo saaro xafiiska maliyadu.

## Qodobka 102 aad <u>Sanad Miisaaniyadeedka</u>

Sanad miisaaniyadeedka maamulada degmooyinka iyo tuulooyinku waxa uu la mid yahay sannad

miisaaniyadeedka dawlada sida uu dhigayo bayaanka maamulka maaliyada.

## **Qodobka 103aad Diwaannada Xisaabaadka**

Maamulada degmooyinka iyo tuuladu waxay sidan soo socota u xafidaan buugta iyo diwaanada xisaabaadka:-

1. Xisaabaadka waa in loo isticmaalo qaababka uu xafiiska maaliyada deegaanku uga soo saaray awaamiirta.

2. Waa in bil walba' la diyaariyo xog qoraal ah oo la xidhiidha faah faahinta miisaaniyada.

3. Xisaabaadka waxaa haynaya xafiiska maaliyada iyo horumarinta dhaqaalaha isagoo wakiil ka ah maamulka degmada ama tuulada.

4. Xafiiska maaliyada (WOFED/BOFED) ayaa xisaab xidh ay ku miisaamayso faraqa u dhaxeeya lacdagtii la helay iyo intii baxday ku samaysa marka sanadku dhamaado, waxayna bil gudaheed ku soo saaraan warbixin Kama dambays ah oo arintaasi la xidhiidha.

## **Qodobka 104aad Hanti-dhawrka Xisaabaadka Degmooyinka**

Xisaabaadka maamulada degmooyinka ayaa loo hubin sida soo socota:-

1. Waxay xoojiyaan hantidhowrka gudaha iyagoo si lama filaan ah u baadhaya sida ay xafiisyadu ay u isticmaalaan lacagta.

2. Xafiiska BOFED ama hanti dhawre ay magacowday ayaa hubiya xisaabaadka sanadkiiba hal mar iyo xiliyo kale ee munaasab loo arko.

3. Warbixinta baadhitaanada waxaa loo gudbiyaa golaha dawlada deegaanka miyiga, dawlada deegaanka oo uu ka mid yahay xafiiska u qaabilsan dawlada deegan hoosaadka iyo hantidhowrka guud ee deegaanka.

4. Hanti dhawrka guud wuxuu hubin karaa diiwaanada, buugta iyo dhukumeentiyada kale ee uu danayanyo.

5. Golaha markuu helo warbixinta hantidhawrka wuxuu u gudbiyaa gudiga golaha ee hantidhowrka iyo miisaaniyada si ay uga baaraan degaan ugana dhiibtaan talo ay wax ku saxayaan.

6. Gudigu wuxuu warbixin dib ugu celinayaa golaha halkaas oo gudoomiyuhuna xaqiijiyo fulinta talooyinka gudigu bixinayaan.

7. Shakhsiyaadka ay ku cadaato wax isdaba Marin dhinaca miisaaniyada ah waxaa laga qaadi talaabooyin anshax iyo kuwo sharciba.

## Qodobka 105aad Maalka iyo Hantida Degmooyinka

Dawlad deegaanka miyigu waa in ay sameeyaan nidaam ay ku maareeyaan kuna maamulaan hantidooda guud iyagoo raacaya tilmaaamahan soo socda:-

1. Gudoomiya kasta laga bilaabo marka uu la wareego iyo intii intaa ka dambaysaba waa in uu sanadkiiba mar tiriyo hantida muuqata (physical stock) ee guurtada ah iyo tan maguurtadaba ah ee dawlada deegaan hooosaadku hantido kadibna warbixin ayuu u gudbiyaa gudiga fulinta, warbixintuna waa in ay ka koobnaataa:

   b) Faahfaahin ku saabsan hantidii sanadkii tagay taalay.

   t) Qiimaha guud ee hantida.

   j) Faaiidada sanadkaas laga helay hantida.

   x) Isbadalka ku dhacay qiimaha.

   kh) Walxaha adeega gabay (isticmaal gabay).

   d) Walaaxaha lumay (baaba'ay).

   r) Hindise ku saabsan sidii loo isticmaali lahaa, horumarin lahaa ama loo tuuri lahaa Hantida taala.

2. Isticmaalka hantidu waa in ay ka koobnaataa ujeedooyinka guud ee dawladda oo kaliya.

3. Xoorida/tuurida/qubida hantida guurtada ah iyo tan maguuraankaba ah waa in loo fuliyaa si waaafaqsan sharciga maaliyada deegaanka.

4. Hantida la qubayo waa in lagu iibiyaa xaraash lagu tartamo.

5. Markay hantida ay lumiso ama waxyeelayso dawladd deegaan hoosaadka waa in warbixin la siiyo gudiga fulinta, markasta oo ay suurto gal tahay ama ay haboontahayna waa in la baadho qofka masuulka ka ahaa qiimihiisana uu bixiyo.

## Qodobka 106aad Taakulaynta Tuulooyinka

Maadaama ay cududooda shaqaale ee dawlad degaan miyigu ay xadidan tahay, tuulooyinku, ma yeelan karaan miisaaniyad ama sanduuq, Waxayse xaalado xadidan awgeed heli karaan:-

1. Taageero ay degmadu u fidiso si ay u fuliyaan mashaariic ama barnaamij gaar ah.
2. Taageeradan waxaa go'aamiya gudiga fulinta ee degmada.
3. Marka taageerada noocan ah la bixinayo waa in la hubiyaa muhimada mashruuca.
4. Taageerada marka la go'aaminayo waa in lagu saleeyaa tirade dadka ka faaiidaysanaya, baahida dhaqaale ee jirta iyo in ay goobta ku haboontahay in la taageero.
5. Isla xisaabtanka la xidhiidha taageerada sidan loo bixiyo waxaa qeexi awaamiir.

# Qaybta 8$^{aad}$

## Xidhiidhka Ka Dhaxeeya Maamulada

**Qodobka 107 $^{aad}$** **<u>Dabagalka Maamulada Degmooyinka</u>**

1. Gudiga fulinta ee deegaanku waxay xaqiijinayaan in waajibaadka ka saaran maamulida iyo taakulaynta degmooyinka loo xilsaaro hal xafiis oo masuuliyadaas dhabarka u rita.

2. Xafiiska masuuliyadaas la saaray isagoo la shaqaynaya xafiisyada kale wuxuu kormeeraa, dabagalaa oo uu maamulaa hawlaha degmooyinka si loo xaqiijiyo in ay waafaqsan yihiin bayaankan.

3. Xafiiska masuuliyadaas la saaray marii ku qanco in ay jirto awood ama waajib loo fuliyay si aan haboonayn, sharci daro ah ama dayacaadi ku jirto, wuxuu shir ugu yeedhaa maamulka degmada isagoo tusaya khaladaadka dhacay kadibna talada ku haboon ayuu siiyaa.

4. Marka xafiisku u arko in khaladaadka dhacay ay culusyihiin madax-xafiiseedku wuxuu dawlada deegaanka kula talin karaa in arinta gudi soo baadha loo xilsaaro.

5. Marka gudiga baadhitaanku uu ku soo ogaadaa in dambi la galay waxay arinta ku wareejiyaan

gudiga fulinta deegaanka iyagoo waliba taladoodana raacaya.

6. Iyadoon wax loo dhimaynin waajibaadka golaha deegaanka xafiiska masuulka ka ah degmooyinka wuxuu xaliyaa khilaafka u dhexeeya degmooyinka.

## Qodobka 108 aad Awoodaha Hakinta Iyo Kala Dirida

1. Iyadoo la waafajinayo dastuurka, golaha xildhibaanada deegaanku haduu u arko sababo ku filan wuxuu hakin ama kala diri karaa dhamaan ama qaar ka mid ah maamulka degmada gaar ahaan:-

    b) Marka ay codsato degmadu ayna tahay danta guud in sidaasi layeelo,

    t) Ama marka qaranimada wadanka, danta dalka iyo/ama deegaanka iyo marka kala danbaynta dastuuriga ah ay halis galiso ficilada aan haboonayn ee degmadu,

    j) Ama markay la rumaysan yahay in ay ku takri faleen dakhligii ama ay faraha la galeen musuq maasuq, ama marka golaha degmadu ayna shir isugu iman in ka badan hal sano iyadoon sabab macquul ah aysan jirin.

2. Marka gudiga fulinta aanu kulmin/shirin isugu imaanin in ka badan lix bilood iyadoon sabab macquul ah aysan jirin hakinta lagu xusay qodobka 108(1) jadaan duruufuhu ka dhigayn qasab in markaaba la fuliyo, waa in marka hore

qoraal lagu faafiyo(daabaco) sababaha loo hindisay hakinta kadibna la dhagaysto dooda iyo diidmada ay qabto degmada ay arintu khusayso.

3. Marka degmada hawlaheeda loo hakiyo si waafaqsan qodobkan 108(1), waa in dawlada deegaanku ay qaado talaabooyinka lagama maar maanka ah ee ku meel gaadhaka ah, si loo xaqiijiyo habsami u socodka maamulkii ay haysay degmadu.

4. Marka hakinta la meelmariyo waa in dawlada deegaanku guddi arinta baadha ay u xilsaarto muddo afartan iyo Shan cisho gudahood ah.

5. Marka baadhitaanka lagu xusay qodob hoosaadka (4) ee qodobkan lagu ogaado in ay jiraan sababo ku filan in la baabi'iyo maamulka degmadaas, wuxuu golaha xildhibaanada deegaanku kala diraa dawladaaas isagoo golaha ay khusaysana siinaya sababta talaabdan (go'aankan) loo gaadhay.

6. Marka kala dirida qodobkan lagu xusay la dhaqan galiyo waa in doorasho la qabto mudo lix bilood ah oo ka bilaabmaysa kala dirka iyadoo la lashaqaynayo Gudiga Doorahsooyinka Qaranka hadaanay jirin sababo aan doorashada loo qaban Karin sida; masiibo dabiici ah, daganaansho & dhaqaale la'aan, waxaa doorashada dagmada dib loogu dhigi karaa muddo ilaa hal sanno ah.

7. Dawlada deegaanku waa inay xaqiijisaa habsami u socodka hawlaha maamulka ee

degmada la baabi'iyey inta laga soo dooranayo gole xildhibaano oo cusub lagana helayo guddi fulin shaqaysa.

## Qodobka 109 aad Kormeerka Iyo Qiimaynta

1. Xafiiska loo xilsaaray dawlad deegaan miyiga iyo xafiisyada kale ee ay khusaysaba waa in ay qiimeeyaan oo kormeeraan waaxyaha iyo xafiisyada dawlada deegaanka miyiga.

2. Xafiiska loo xilsaaray dawladda deegaan hoosaadka si uu uguto dabagalka iyo kormeerka kor lagu xusay waxaa lagama maarmaan ah:

    b). in uu aasaaso nidaam dhisan oo dabagalka iyo kormeerka ee dawldd deegaan hoosaadka isagoo tixgalinaya danaha xafiisyada Wuuxuu si gooni ah u helaa ugana baaraandagaa warbixinta dib loogu eegayo waxqabadka sanadka ee dawladda deegaan hoosaadka isagoo waliba markay suurta galtahayna ka qaybqaadanaya shirarka ku saabsan dib ueegista waxqabadka ee sanadka.

    t). in uu dhabarka u rito gaadhsiinta xogta kormeerka xafiisyada kale ee heer deegaan.

**Qodobka 110aad** **<u>Taageerada Dawladda u fidiso Maamulada Degmooyinka</u>**

1. Xafiiska loo xilsaaray dawladda deegaan hoosaadka ayuu xil kasaaran yahay horumarinta awooda dawladda deegaanhoosaadka.

2. Xafiisyada heer deegaan wuxuu xil ka saaran yahay in ay ka caawiyaan maamulada dagmooyinku waxyaabaha ay sida gaarka ah uga shaqeeyaan ee ka dhexeeya, iyagoo siinaya taakulo farsamo iyo mid qalab sidoo kalena kobcinaya awoodooda.

**Qodobka 111aad** **<u>Xidhiidhinta Iyo Iskaashiga La Siiyo Maamulad Degmooyinka</u>**

1. Xafiiska loo xilsaaray dawladahan waa inuu ahaadaa mid ku haboon xidhiidhinta iyo kor u qaadista arimaha dawladahan, Si arintaas loo ogaadana waxaa loo baahanyhay:

   b) In uu abuuro hab heer deegaan ah oo laysugu keeenayo wakhtiga iyo goobta ku haboon dhamaan hay'adaha iyo xafiisyada si looga doodo xalna looga gaadho arimaha guud ee dawladaha deegaanka miyiga.

   t) Inuu fududeeyo shir joogto ah oo laysugu keenayo dawladaha si ay uga tashadaan arimaha ka dhexeeya.

2. Marka dawladuhu ay sameeyaan urur waa inuu hawlaha ururku ee khuseeya dawlada deegaanka miyiga si gaar ah uga qayb qaato.

## Qodobka 112 aad Xoggaha Tala-bixinta, Daraasaadka Iyo Horumarinta

1. Xafiiska u xilsaaran dawladahan wuxuu dawladaha si joogta ah u siiyaa wərarka iyo talooyinka ugu wanaagsan ee dhinaca maamulka iyo adeeg bixinta, wuxuuna waafi ah kabixiyee codsiyada dawladaha ee lagu doonayo warar ama talooyin gaar ah cayiman.

2. Xafiiska u xilsaaran dawladaha wuxuu fuliyaa daraasaad iyo hawlo harumarineed oo la xidhiidha arimaha dawlada deegaanka miyiga.

## Qodobka 113 aad Waajibaadka Wada Shaqayneed

1. Maamulada degmooyinku wuxuu xilkasaaran yahay in ay iskuxidhaan hawlahooda iyo kuwa maamulada magaalooyinka goobahooda ka jira waxayna arintaas u samayn karaan gudi gaar ah.

2. Mas'uuliyiinta xafiisyada deegaanku waxay degmooyinka kula heshiin karaan in ay ka caawiyaan dhinaca hawlaha horumarinta.

3. Degmooyinku waxay maamulka deegaanka kala shaqaynayaan horumarinta deegaanka waxayna mas'uulada siiyaan galaangal dhanka

wararka iyo xog is waydaarsi ah si ay u suurto gasho gudashada wajibaadada balaadhaan ee maamulada kala duwan saaran.

4. Degmooyinka waxaa waajib ku ah in ay wararka iyo xogaha ay hayaan u gudbiyaan maamulada sare iyagoo isticmaalaya foormaadyada iyo wakhtiyada loo diyaariyay.

## Qodobka 114aad Xidhiidhka Iskaashi Ee Maamulada Degmooyinka

1. Maamulada degmooyinku waxay samaysan karaan xafiis (guddi) ka shaqeeya danaha ay wadaagaan.

2. Gudduga noocan ah waa in loo diiwaan galiyaa kuna shaqeeyaa si waafaqsan qawaaniinta dawlada ee khusaysa.dawlada deegaanka waxaa waajib ku ah in ay aqoonsato Lena shaqayso guddigaas.

3. Xeer hoosaadka (xeer aasaasida) ee guddiga ayaa lagu qeexi sida uu u'shaqaynayo qaab-dhismeedka uu yeelanayo guddigu.

4. Guddigu wuxuu qaban karaa shaqooyinka soo socda: -

   b) Wuxuu kor u qaadaa wada shaqaynta degmooyinka iyagoo is dhaaf-sanaaya oo wadaagaya khayraadka, khibradaha iyo fikradaha.

   t) Wuxuu matalaa (u istaagaa) dhamaan dawladaha arinmaha ay wadaagaan

wuxuuna cadeeyaa aragtidooda ku aadan danaha ka dhexeeya.

j) Wuxuu ku dhiirigaliyaa maamul ku dhaqanka iyo saraynta sharciga.

x) Wuxuu gacan ka gaystaa sidii loo kobcin lahaa awooda xubnahooda iyadoo la siinayo tababaro iyo taageero dhanka qalabka iyo dhaqaalahaba ah.

kh) Wuxuu u soo saaraa xubnihiisa hab dhaqameed qoran wuuna ku dabagalaa ku dhaqankiisa.

d) Wuxuu fuliyaa shaqooyinka kale ee gacan ka gaysanaya horumarka goobaha ay degmooyinku ka wada hawl galaan.

5. Degmooyinka dariska ah waxay ka wada shaqayn karaan danaha darisnimo ee ay wadaagaan iyagoo awoodnna u leh in ay gudiyo wadaaga ah u sameeyaan arimahooga xiidhiidhiya, hase ahaate wada shaqayntan iyo gudiyada waa in lagu wargaliyaa laamaha kale ee dawlada.

## Qodobka 115aad Xidhiidhka Degmooyinka Iyo Tuulooyinka

1. Maamulada degmooyinka wuxuu xil ka saaran yahay in ay tuulooyinka taageeraan ayna siiyaan xoggaha iyo talooyinka gacanta ka gaysanaya siday uga soo bixi lahaayeen waajibaadkooda.

2. Maamulada dagmooyinku waa in ay dhaxdhaxaadiyaan tuulooyinka markasta oo muran soo dhexgalo.

# QAYBTA 9^AAD

# CUDUDA SHAQAALE

## Qodobka 116 ^aad **Heerarka Shaqaalaynta Iyo Qaabdhismeedka**

1. Maamulada degmooyinku iyagoo raacaya tilmaamaha xafiisyada deegaanka ee xidhiidhka shaqo ay wadaagaan waxay soo diyaariyaan qaabdhismeed haboon oo ay u gudbiyaan xafiisyada deegaanka iyagoo tix galinaya arimaha soo socda:

   b) Shaqooyinka qaabdhismeedka loogu talagalay.

   t) Kharashka qaabdhismeedka ku baxaya.

   j) Awoodaha dhaqaale iyo dakhli.

   x) Culayska shaqo ee laga filayo hawlaha la qorsheeyey.

   kh) Cududa shaqaalaha xirfadlaha ee la haysto.

2. Qaabdhismeedka waxa loo gudbinayaan xafiiska shaqaalaha dawladda ee deegaanka iyagoo sii marinaya maamulka deegaanka si loo ansixiyo.

3. Iyadoo lagu salaynayo heshiis dhexmara maamulka degmooyinka iyo dawladda

deegaanka, wuxuu golaha fulinta ee degmadu u gudbiyaa golihiisa hindisaha qaabdhismeedka si uu ansixiyo.

**Qodobka 117 aad** **Shaqaalaynta Iyo Arimaha Laxidhiidha**

1. Maamulada degmooyinku waxay leeyihiin awoodaha iyo shaqooyinka la xidhiidha maaraynta cududa shaqaalaha oo ay ka mid yihiin arimaha soo socda: -

   b) Qorshaynta cududa shaqaalaha.

   t) Qorista, xulashada, shaqaalaynta, dalac siinta, meelaynta, badalka gudaha ah, mushaar korodhka iyo qaadista talaabaooyinka fudud ee dhinaca anshaxa ah.

   j) Dib u meelayn (adkayn boos shaqo) (re-entrenchment) ama shaqaalayn aan rasmi ahayn (assignment of floaters).

   x) Tababar iyo horumarin, qiimaynta shaqo fulinta, eryida,hoos u dhigida, diyaarinta shaqo qeexid iyo uruurinta iyo isku habaynta xogta maaraynta cudada shaqaalaha.

2. Maamulada degmooyinku waxay shaqaalaysan karaan masuulo iyo shqaale iyagoo ku salaynaya qaabdhismeedka shaqaalaha ee la ansixiyay waxayna boos kasta u diyaarisaa shaqadiisa oo qeexan.

3. Boosaska banaana waa in loo bandhigo dadwaynaha laguna shaqaaleeyo qof aqoon iyo waaya aragnimo leh.

4. Shaqaale kasta wuxuu hoos tagaa maamulkiisa degmo isagoo loo marayo madaxa xafiiska uu la shaqeeyo waana in la qiimeeyo wax qabadkooda laba jeer sanadkiiba isagoo la raacayo nidaamka wax soosaarka ku salaysan ee lagu qiimeeyo waxqabadka.

5. Xafiis kasta oo degmo wuxuu shaqaalayn karaa shaqaale ku meelgaadh ah oo loogu talagalay shaqo deg deg ah oo ku meelgaadh ah, hase ahaate heshiisku Kama badan karo sadex bilood, Faahfaahinta isku dubaridka hawsha waxaa loo fulin si waafaqsan sharciga deegaanka ee shaqaalaha dawlada.

6. Iyagoo u hogaansan qodobka iibka ee bayaankan waxay maamulada degmooyinku heshiis shaqo oo wakhti kooban ah la gali karaan qandaraasle ama la taliye, xaaladaha noocan ah xafiisyada deegaanka ama xafiisyada shaqadu ka dhaxayso waxaa la waydiisan karaa in ay talo ka bixiyaan geedi socodka hawsha.

7. Marka maamulada degmooyinka ay ka hortimaado shaqaale yaraan daran islamarkaana ay iskeed wax uga qaban waydo waxay xafiiska deegaanka ka codsan kartaa in shaqaalaha ay u baahan yihiin loo soo wareejiyo si ay mudo kooban ula shaqeeyaan.

8. Marka dawlada deegaanku ogolaato wareejinta shaqaalaha, shaqaalahaasi, waxay dhinaca shaqo fulinta hoos tagayaan maamulada

degmooyinka dhinacyada kale oo dhana dawlada deegaanka.

9. Hawlaha uu ka tagay bayaankani waxaa loo daayay xafiiska deegaanka iyo xafiiska shaqaalaha dawladda.

10. Faahfaahinta maaraynta cududa shaqaalaha ee maamulada degmooyinka waxaa lagu cadayn xeerarka iyo awaamiirta xafiiska shaqaalaha dawlada.

11. Kooxda kormeerka ee xafiiska shaqaalaha dawlada, ayaa hubinaya oo qabanay hawlaha maaraynta cududa shaqaalaha iyagoo raacaya xeerka iyo awaamiirta xafiiska.

## Qodobka 118aad Lacagaha Shaqaalaha La siiyo Iyo Shuruudaha

1. Lacagaha shaqaalaha la siiyo iyo shuruudaha adeega uu shaqaaluhu bixiyo, waxay ku salaysnaanayaan sharciyada iyo awaamiirta shaqaalaha dawladda.

2. Lacagaha iyo shuruudaha adeega ay bixiyaan saraakiisha magacaabista ahi waxaa xeerin doona sharciga.

3. Isagoon la dhawrayo qodob farqadiisa (1) ee qodobkan, dawladd deegaan hoosaadku iyagoo ka duulaya xaaladooda dhaqaale waxay soo bandhigi karaan lacago iyo arimo kale oo ay ku dhiiri galinayaan shaqaalaha iyo mas'uulada magacaabista ah.

## Qodobka 119 [aad] Hab Dhaqameedka

1. Dhamaan masuuliyiinta magacaabista ah iyo shaqaaluhba waxay raacayaan hab dhaqameedka shaqadooda la xidhiidha ee ay soo saaraan xafiisyadooda uuna kordhiyay xafiiska anshaxa iyo la dagaalanka musuqmaasuqa qaranku.

2. Dhamaan shaqaalaha dawladdu markay galaan dambiyo anshaxa la xidhiidha waxay u hogaansamaan habraacyada anshaxa ee uu xusayo bayaanka shaqaalaha dawladda ee uu dib u cusboonaysiiyay xafiiska shaqaalaha dawladda ee degaanka.

3. Iyadoo la ilaalinayo qodob hoosaadka (1aad) ee qodobkan, masuuyiita ama shaqaalihii lagu helo mid ka mid ah dambiyada soo socda waxaa laga eryi karaa shaqada musuq-maasuq awgeed waxaana loola dhaqmi sida uu sharcigu qabo:

   b) Lunsi lacageed ama hanti kale ee dawlad deegaan hoosaadka.

   t) Raadinta (soliciting), dalbashada, ogolaanshaha ama isku day helid lacag ama abaalgud lagu soo jidanayo taasoo ka baxsan dhiiri galinta ay siiso dawladda deegaan hoosaadku.

   J) Wada hadal ama heshiis galid uu ku matalayo dawladd deegaan hoosaadka, isagoon cadaynin danta dhaqaale ama dan kale in uu ka leeyahay arinta ama shakhsi oo kala dhexeeya dhinac ka mid ah dhinacyada heshiiska.

## **Qodobka 120[aad] Tababarka Iyo Horumarinta Shqaaalaha**

1. Xafiis kasta oo maamulada degmooyinka waxaa waajib ku ah in uu ogaado baahida shaqaalaha ee dhinaca tababarka ayna u diyaariyaan qorshe iyo miisaaniyad lagu tababaro oo lagu horumariyo, si ay taasi u xaqiijiso in ay xilkooda u gutaan si wax ku ool ah, cadcadaan iyo isla xisaabtan leh.

2. Xafiisyada deegaanka waxaa uu xilka saaranyahay in ay dhisaan awooda degmooyinka iyo tuulooyinka oo ay la shaqeeyaan si hubaal looga dhigo isku xidhka iyo in barnaamijyadu ay u qabsoomaan si haboon.

3. Xafiiska kobcinta awooda ee deegaanku wuxuu xil guud ka saaran yahay in uu ogaado horumarinta cududa shaqaalaha dawlada deegaanka miyiga uuna is kuxidho dadaalada xafiisyada kala duwan ay ugu jiraan kobcinta awooda.

# Qaybta 10aad

## Qodobo Kala Duwan

### Qodobka 121 aad **Awooda Soo Saarista Xeerarka Iyo Awaamiirta**

Iyadoo la raacayo shuruudaha bayaankan waxaa xeerar iyo awaamiir lagu faah faahinayo bayaankan soosaa xafiisyada hoos ku xusan: -

1. Iyaduun ku koobnayn qodobada bayaankan, golaha fulinta deegaanku waxuu awood u leeyahay in uu soo saaro xeer hoosaad si loo dhaqan galiyo bayaankan.

2. Xafiisyada deegaanka ee ay khusayso iyo xafiiska u xilsaaran degmooyinka waxay inta sharcigu u fasaxayo ku soo saari karaan awaamiir ay ku fulinayaan bayaankan iyo xeerarka isaga faahfaahinaya.

3. Maamulada degmooyinka iyo tuulooyinku waxay soo saari karaan awaamiir si ay u gudataan waajibaadkooda iyadoo waafaqsan xeerarka iyo awaamiirta ay soo saaraan xafiisyada kor ku xusan.

### Qodobka 122aad **Wareejinta Khayraadka, Xuquuqaha Iyo Waajibaadka**

1. Dhammaan hantida iyo daynta, xuquuqda iyo xilalka ay dawladaha deegaan-hoosaadku ku muteen sharciyo ama ficillo hore waxay ku wareegayaan dawlada deegaan-hoosaadka cusub ee ku aasaasantay bayaankan.

2. Dhamaan falalka iyo talaabooyinka ay fulisay dawlada deegaan hoosaadkii hore iyagoo raacaya sharciyadii xligaasi jiray waxaa loo tixgalin in dawlada deegaan miyiga cusub ay fulisay oo bayaankana la raacay.

## Qodobka 123aad <u>Qodobada Kala Guurka</u>

1. Waxaa reeban bayaan, xeer-xukuumadeed, awaamiir ama dhaqan kasta oo ka hor imanaya bayaankan in loo isticmaalo arimaha bayaankan lagu xeeriyey.

2. Xuquuqaha ay maamulada degmooyinka iyo tuulooyinku ku heleen sharciyo hore, bayaankani ma saamaynayo.

## Qodobka 124aad <u>Mudada Dhaqangalka Bayaankan</u>

Bayaankani wuxuu dhaqan galayaa laga bilaabo maalinta lagu soo daabaco Dhool Gazetta.